HERITAGE INSTITUTE

# KU DHAQANKA SHARCIGA *iyo* MADAXBANNAANIDA GARSOORKA SOOMAALIYA

Jannaayo 2025



## Ku Saabsan Qoraaa

Qoraagu waxa uu haystaa shahaadada Ph.D. oo uu ka qaatay Jaamacadda Georgetown, J.D-na waxa uu ka qaatay Jaamacadda Gobolka Georgia (Georgia State University). Waa qareen Soomaali-Mareykan ah, oo sharciga nidaamka federaalka Mareykanka u leh in ka badan 20 sano oo khibrad ah.  Sida oo kale, waxa uu Agaasime Sare ka yahay Laasfort Consulting Group, waxaanu Lataliye Sare oo dhanka Sharciga ah ka yahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage. Cilmibaaristani waxa ay ka dhalatay damaca fog iy hayaanka ay Soomaaliya ugu jirto nidaamka faderaalnimada iyo caqabadaha ku gadaaman, sida qabyaaladda, qarannimada seeskeedu jilicsan yahay iyo jaahwareerka ku xeeran sooyaalka dawladnimada Soomaaliya.

**Bashir M. Sheikh-Ali, J.D., Ph.D.**

**Xuquuqda daabacaaddan © 2025 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2025.**

# Tusmada


**1. Nuxurka Daraasadda** 4

**2. Hordhac** 6

**3. Habraaca Daraasadda** 8

**4. Sareeynta Sharciga** 9

**5. Taariikhda Ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya** 10

**6. Ku dhaqanka sharciga iyo Dastuurka Kumeelgaarka ah** 13

**7. Hirgelinta Ku dhaqanka sharciga** 14

7.1 Astaynta Awoodaha Federaalka 14

7.2 Garsoor Madaxbannaan 15

7.3 Garsoorka: Laanta Saddexaad ee Dowladda 16

7.4 Madaxbannaanida Garsoorka iyo Caddaaladda Shareecada Islaamka iyo Dowladnimada Casriga ah 18

7.5 Garsoorka iyo Dastuurka Kumeelgaarka ah 20

7.6 Gaarsoorka Federaalka iyo Doorkiisa aan Dimuqraadiga ahayn: Dibu-eegista Garsoorka 21

**8. Madaxbannaanida Garsoorka** 24

8.1 Madaxbannaanida Qofka Garsooraha ah 26

8.2 Madaxbannaanida Nidaamka Garsoorka 26

**9. Xaaladda Garsoorka ee Xilligan iyo Isbedellada la soo Jeediyey** 29

**10. Maxkamadaha Iskudhafan iyo Dastuurka kumeelgaadhka ah** 32

**11. Dhismaha Nidaam Maxakamadeed oo Iskudhafan** 38

11.1 Qiimeynta Xaaladda Garsoorka 39

11.2 Dibuhabeynta Hay’adaha Mihiimka u ah Bahda Caddaaladda 40

**12. Waajibaadka Anshaxa ee Hawlwadeennada Caddaaladda iyo Tababarrada** 46

**13. Xoojinta ku Dhaqanka Sharciga, Iyada oo loo Marayo Waxbarashada** 47

**14. Talabixino** 49

**15. Tixraacyo** 51

# 1. Nuxurka Daraasadda

Soomaaliya waxa ay leedahay hiddo-dhaqameed hodan ah oo ay udub-dhexaad u yihiin aftahannimo iyo raadinta caddaaladda iyo sinnaantu. Erayada ay ka midka yihiin xaq iyo xaqdarro ayaa ka turjumaya sida qotada-dheer ee ay bulshada Soomaaliyeed u cisayso caddaaladda iyo sinnaanta. Inkasta oo ay dhaqanka iyo diintuba dhiirrigaliyaan cadaaladda, sinnaanta, iyo dhexdhexaadnimada, haddana weli way adagtahay in lagu tallaabsado ku dhaqanka sharciga.[1] Iyada oo nidaam iyo hay'ado sharci oo wax ku ool ahi ay lafdhabar u yihiin dhidibba u aasidda ku dhaqanka sharciga, haddana tobannaan sano oo ay Soomaaliya la daalaa dhacaysay nugayl iyo soo kabasho ay diiradda ku saarayso xasillinta iyo dibuhabeynta hay'adihii burburay ee dowladda ayaa si xun u ragadiyey dadaallada loogu jiro hirgelinta caddaaladda. Si la isku waafajiyo goldaloolooyinka ka dhex jira aragtiyaha Soomaalidu ka haysato dhexdhexaadnimada iyo gaabiska kaga jira dhanka caddaaladda, waxa lama huraan ah dhisidda hay'ado ay ka go'an tahay gacansiinta sarreeynta sharcigu. Tallaabooyinkaa waxaa ka mid ah dhismaha garsoor madaxbannaan, kor u qaadista wacyiga bulshada iyo xoojinta mabaadi'da dimuqraaddiyadda si loo abuuro dhaqan bulsheed caddaalad ku dhisan.

Dadaalladii hore ee lagu doonayay dhidibba u aasidda ku dhaqanka sharciga, gaar ahaan kuwii 1960-neeyadii way wada fashilmeen, waxaana ka dhashay cabsi iyo xakamayn la'aan awoodeed oo xargaha goosatay. Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012 la qoray, waxa looga gollahaa in caqabadahaas lagu xalliyo, iyada oo la dajinayo xayndaab sharci oo waafaqsan mabaadi'da Shareecada Islaamka iyo caddaaladda. Dastuurkan waxaa lafdhabar u ah mabaadi'da kala saaridda awoodaha, qaybinta masuuliyadaha maamul ee ka dhexeeya laamaha fulinta, baarlamaanka iyo garsoorka, si loo hubiyo isla xisaabtanka iyo isu dheellitirnaanta awoodaha. Si kastaba ha ahaatee, dastuurka kumeelgaarka ahi si cad uma kala qeexayo awoodaha ay kala leeyihiin dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu.

Waxa uu Dastuurkan qabyada ah oo uu marmarka qaarna madmadowga badani ku jiro curyaaminayaa maamulka dawladnimo, waxa uuna abuurayaa walaac laga qabo sharciyadda xeerarka dowladda federaalka iyo kuwa maamul-goboleedyadaba. Marka la eego nidaamka federaalka ah, doorka garsoorku waa mid aad ugu muhiim ah xaqiijinta ku dhaqanka sharciga, isaga oo si dhexdhexaadnimo ah u fasiraya xeerarka dastuuriga ah, isla markaana sharciga ku ilaalinaya xadgudubyada siyaasadda. Balse nasiib darro, garsoorka Soomaaliya taariikh ahaan waligii wuxuu ahaa mid taag daran oo ay siyaasadi dhalanrogtay, taas oo xaddidday gudashada waajibaadkiisii aasaasiga ahaa.

1. Sida lagu faahfaahin doono warbixintan, ku dhaqanka sharcigu si weyn uga maqan yahay Soomaaliya, waxaana lagu doodi karaa in ay xaaladdani soo taxnayd tan iyo markii maamullada gumaysigu yimaaddeen xeebaha Soomaalida. Kudhaqan la'aanta sharciga ayaa si weyn u soo shaacbaxay 30-kii sano ee la soo dhaafay, waxaanay burburka sharciga iyo kaladambeyntu ka dhasheen burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya.

Waxa uu Dastuurka Kumeelgaarka ahi dhigayaa qaab-dhismeedka aasaasiga u ah laanta garsoorka, isaga oo jaangoynaya maxakamado saddex derejo ah, balse waxa uu faahfaahin badan oo qaab-dhismeedka iyo hawlaha garsoorka ku saabsan u dhaafay wadaxaajood iyo dhammaystir siyaasadeed. Dastuurku waxa uu Maxakamadda Dastuuriga ah siinayaa awoodda dibu-eegista go'aan gaarista sharcinimada xeerarka uu ansaxiyo Baarlamaanka Federaalka ahi. Haseyeeshee, waxaa sharcigaa duri kara xubno gaar ah oo madaxda Federaalka ah (sida dhammaan xubnaha Aqalka Sare, saddex meelood hal meel¬=1/3 oo Golaha Shacabka ama Golaha Wasiirada ah), hal dowlad goboleed ama tobban kun (10,000) oo codbixiyeyaal diiwaangashan ah oo keli ah; taasi oo wiiqaysa ku dhaqanka sharciga.

Intaas waxa dheer, qodobbada Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee ku saabsan korjoogtaynta garsoorka ee hawlaha laanta fulinta waa kuwo kooban oo jaahwareersan. In kasta oo uu DKMG ahi xambaarsanyahay habab dammaanad qaadaya madaxbanaanida garsoorka, sida soo-jeedinta dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka (GAG) iyo Maxkamadda Dastuuriga ah, haddana hay'adahaas weli lama dhisin fadhiidnimo siyaasadeed owgeed.

Sannadkii 2018, waxaa shir isugu yimid Wasaaradda Cadaaladda ee Dowladda Federaalka ah iyo dhiggeeda Dowlad Goboleedyada, waxa ayna ka doodeen hannaanka garsoorka Soomaaliya.

Heshiiskii siyaasadeed ee lagu gaarey Jowhar waxa uu soo jeediyey nidaam maxakamadeed oo iskudhafan, kaas oo Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyadu ay ku wadaagayaan qaabdhismeedka maxkamadaha iskudhafan.

Nidaamkani waxa uu garsoorayaasha u ogolaanayaa in ay galaan dacwadaha heer federaalka iyo heer dowlad goboleed labadaba, taas oo siineysa awood garsoorid oo isgarabtaal. Golaha Wasiirrada iyo Golaha Wadatashiga Qaranku waxa ay turxaan-bixiyeen nidaamka maxakamadda iskudhafan ee heshiiskii Jowhar lagu soo jeediyey, iyaga oo wax ka qabtay oo xal u helay qodobbadiisa qaarkood oo isburinayay.

Si kastaba ha ahaatee, hirgalinta nidaamka noocan ahi waxa uu u baahanyahay hoggaan hal-adayg leh iyo garsooreyaal xirfad leh. Sidoo kale, qaar ka mid ah dhinacyada ay khuseeyso ayaa walaac ka muujiyay habkan iyo saameynta uu ku yeelan karo qaybaha kale ee nidaamka caddaaladda— sida xeer-ilaaliyeyaasha, booliiska iyo maxaabiista. In hawlahan oo dhan lagu soo ururiyo maamulka dhexe waxa ay horseedi kartaa fashil federaalka ah, waxa ayna meesha ka saaraysaa mabaadi'da faderaalaynta oo xoogga saaraya maamul-daadejinta iyo isla xisaabtanka maxalliga ah. Waxa intaas dheer, iskudhafka nimaadyada caddaaladdu waxa uu xaddidayaa islaxisaabtanka, maadaama ay maxkamadaha maxalliga ahi inta badan iyagu dawladda dhexe uga fahan fiicanyihiin caqabadaha u gaarka ha.

Inkasta oo fikradda nidaamka maxakamadda iskudhafani ay u muuqato fursad lagu dhisi karo nidaam garsoor oo shaqaynaya oo la jaanqaadaya qaabdhismeedka dowladda Soomaaliya, haddana waa in arrimaha maamul ee waaweyn ee dalka ka jira iyagana xal loo helaa. Si loo xaqiijiyo madaxbannaanida maamul ee dowladgoboleedya loona ilaaliyo isudheellitirnaanta awoodda, waxaa muhiim ah in la tixgeliyo nidaamyada caddaaladeed ee dowlad goboleedyad.

Haddii ay Soomaaliya qaadato nidaamka caddaaladda iskudhafan, waxa ay u baahanaysaa in ay si taxadar leh u maarayso arrimaha adag ee ka dhasha isku darka nidaamyada dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada; iyada oo maarayneysa caqabadaha awood-qaybsiga.  Qaabdhismeedka nidaamka maxakamaddu waa in uu maamullada maxalliga ah u dammaanad qaadayo awood ay ku bixiyaan adeegyo caddaaladeed oo siyaabo ku habboon uga turjumaya qiyamkooda iyo baahiyahooda. Hannaan dheellitiran oo ixtiraamaya madaxbannaanida maamul ee maxalliga ah, isla markaana kor u qaadaya hufnaanta dowladnimada ayaa lama huraan u ah in uu guulaysto garsoorka Soomaaliya iyo guud ahaan horumarkeeda ballaaran ee dhanka dimuqraadiyadda iyo ku dhaqanka sharciga ah.

Cilmibaaristani waxa ay dhiirrigalinaysaa in la sameeyo hay'ado iyo xayndaabyo sharci oo xooggan, iyada oo diiradda la saarayo in dhaqanka Soomaaliyeed ee u heellanaanta cadaaladdu, haddii si saxan looga faa'iideysto, uu dalka ka abuuri karo dibucurasho sharciyeed.

## 2. Hordhac

Sarreeynta sharcigu waxa ay aasaas u tahay bulsho kasta, maqnaanshihiisuna waa tan keentay caqabadaha maalin laha ah ee soo foodsaaray bulshada Soomaaliyeed. Haddii la waayo xayndaab sharci oo sugan, waxaa adkaanaysa in ay dadku helaan xuquuqdooda, taasina waxa ay keenaysa cabsi iyo xasillooni darro baahsan. Hannaan sharci la'aantu waxa ay abuurtaa deegaan ay khilaafaadku si fudud isugu beddeli karaan rabshado colaadeed, halkaas oo ay musuqmaasuqa iyo ku tagrifalka awooddu xarkaha goostaan. Marka la waayo ku dhaqanka sharciga waxaa hubanti la'aan gala adeegyada aasaasiga ah, sida waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo amniga; taas oo sii mijaxaabisa xasilloonida bulshada. Sida oo kale, waxaa talaxgaba dhaqdhaqaaqyada dhaqaale sababta oo ah xuquuqda hantiyeed lama ilaalinayo, waxaana korodha halista soo wajahda maalgashiga, taas oo sii daba-dheeraysa saboolnimada iyo xasillooni darrada.  In loo diido fursadda ku noolaansha meel sharcigu sarreeyo ayaa noqoneeysa dulmiga ugu weyn ee ay dowladihii kala dambeeyay ee taariikhda dalka soo maray ka galeen bulshada Soomaaliyeed.

Dhaqanka Soomaalidu waxa uu caan ku yahay hodantinimada dhanka afmaalnimada ah iyo farshaxanaynta soo bandhigista afkaaraha dhaqmeed ee muhiimka ah. Haseyeeshee, waxa aan tixgalin muhiim ah la siinin sida ay Soomaalidu u cabbiraan artidooda caddaaladda ku saabsan, iyo sidoo kale haddii taasi ka tarjumayso sida ay agtooda cadaaladdu ugu weyn tahay.

Inkasta oo la soo maray tobannaan sano oo sharciga la laalay, haddana Afka Soomaaliga waxaa ka buuxa oraahyo murtiyeed oo xambaarsan mudnaansiin qota-dheer iyo u yoomid cadaaladeed oo xooggan. Inkasta oo aanay cilmibaaristani ku saabsanayn hab togan u lafaguridda cilmi-afeed khuseeyao xiriirka ka dhaxeeya dhaqanka Soomaalida iyo cadaaladda, haddana u adeegsiga sida joogtada ah ee weliba fudud ereyada iyo halkudhegyada cadaaladda ka hadlaya ee sheekooyinka maalinlaha ah waxa ay muujinayaan dhaqan ah u heellanaan caddaaladeed oo ku duugan bulshada Soomaaliyeed.

Erayada joogtada ah ee Afka Soomaaliga, sida caddaalad iyo caddaalad-darro, dulmi, gar iyo gardarro, xaq iyo xaqdarro dhammaan waxa ay muujinayaan in Soomaalidu hidde soo jireen ah u leedahay aamminsanaanta weyneeynta dhaqanka cadaaladda iyo ku dhaqanka sharciga. Joogtaynta adeegsiga erayadani waxa ay caddaynaysaa dhaqan togan oo ku aroora tixgalinta iyo maamuusidda caddaaladda. Haddii aragti-dhaqameedkan guunka ah la dardargaliyo oo si hufan looga faa'iidaysto, waxa ay abuuri kartaa bulsho Soomaaliyeed oo caddaaladda ku dhaqanta.

Sidoo kale, caddaaladdu waxa ay tiirdhexaad u tahay mabaadi'da Islaamka, iyada oo Quraanku uu aad u adkaaynayo waajibinta ilaalinta caddaaladda ee arrimaha qofeed ah iyo kuwa sharciyeedba. Mabda'ani waxa uu ina farayaa in go'aannada sharciga ah oo dhammi noqdaan kuwo caddaalad ah, eexi ku jirin, isla markaana Shareecada waafaqsan. Aragtida ay bulshooyinka casriga ahi ugu yeeraan "Ku dhaqanka sharciga" waxa ay u dhigantaa waxa ay culimada islaamku ku qeexaan "Caddaaladda Islaamka," taas oo si qota-dheer ugu duugan mabaadi'da Shareecada. Waxa mabaadi'daasi ka mid ah in go'aan kasta oo sharci ah lagu saleeyo caddaalad iyo dhexdhexaadnimo; u sinnaanta sharciga iyadoo aan loo eegin cidna maqaam/dabaqad bulsho; helista xaqa uu qofku u leeyhay garsoor cadaaladeed; xaq-sheegnimada markhaatiyada; iyo daacadnimada iyo hufnaanta garsoorayaasha. Waxaa kale oo garsoorayaasha laga rabaa in ay si caddaalad ah oo aan eex lahayn sharciga u fasiraan uguna dabaqaan xallinta murannada dadweynaha. Sida kiisaska dembiyada, arrimaha shaqada iyo weliba isku-qabsiga la xiriira arrimaha gaarka ah; sida murannada ka dhasha iskuqabsiga dhulka iyo isfaham waaga heshiisyada. Si kastaba ha ahaatee, iyada oo ay Soomaaliya leedahay aasaas adag oo dhaqameed iyo diimeed oo si dabiici ah u waafaqsan sarreeeynta sharciga, haddana weli mabaadi'dan looma fulin si buuxda oo dhaqan muuqda looma rogin. Iswaafaq la'aanta mabaadi'da aasaaska u ah bulshada Soomaaliyeed iyo dhaqangalka sharcigu waxa ay ka tarjumaysaa fashil dowladeed, taasi oo curyaamisay in sarreeynta sharcigu ka hanaqaaddo dalka Soomaaliya.

Caqabado hoggaamineed ayaa sii dabray horumarka iyo dhaqangalka xeerarka dhaqameed iyo diimeed ee bulshada, taas oo gacan ka gaysan lahayd sees u dhigidda xayndaabka sharci ee lama huraanka u ah hirgelinta ku dhaqanka sharciga. Amni darrada joogtada ah iyo goldaloolooyinka nimaadka sharciga ee hadda jira ayaa curyaamiyay dhaqangelinta aragtiyo caddaaladeed oo macno leh, taas oo xannibtay in muwaaddiniintu ku tallaabsadaan natiijooyin caddaaladeed oo wax ku ool ah. Isqardhaafka mabaadi'da dhaqameed iyo kuwa diimeed ee Soomaaliya iyo waaqica caddaaladeed ee dalka ka jiraa waxa ay hoosta ka xarriiqayaan baahida degdeg ah ee loo qabo dib u habayn qaabdhismeed iyo yagleelidda hay'ado xal u keeni kara isdiidooyinkaas. Daraasaddani waxa ay u kuurgalaysaa hay'adaha iyo nidaamyada lafdhabarta u ah ilaalinta ku dhaqanka sharciga, kuwaas oo qaar badani aaney hadda ka jirin Soomaaliya. Waxa uu qoraaga cilmibaaristani ku doodayaa in dhisidda hay'adahan oo ay weheliyaan dadaallo wacyigalineed oo qorshaysani ay Soomaaliya u fududayn karaan dajinta iyo joogtaynta xayndaab sharci oo gacan ka gaysta ku dhaqanka sharciga.

# 3. Habraaca Daraasadda

Cilmibaaristan waxa looga golleeyahay in loo jidbixiyo aasaaska ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya, waxa ayna si gaar ah xoogga u saaraysaa muhiimadda doorka garsoorka. Iyada oo garowsan in garsoor si wanaagsan u shaqeeyaa uu lafdhabar u yahay ku dhaqanka sharciga, waxa ay daraasaddu iftiiminaysaa sida uu garsoorku u saameeyo hawlwadeennada kale ee muhiimka ah, sida hay'adaha sharci fulinta, hay'adaha dembibaarista, xeer-ilaaliyayaasha iyo xarumaha asluubta iyo xabsiyada, si loo xaqiijiyo u hoggaansanaantooda mabaadi'da caddaaladda. Garsoor xooggan wuxuu door lixaad leh ka ciyaaraa dhawrista ku dhaqanka sharciga isaga oo ku hagaaya laamaha kale ee dowladda in ay ilaaliyaan caddaaladda iyo isla xisaabtanka.

Waxa uu Qoraaga darasaddani soo xiganayaa sahanno cilmibaariseed oo ay sameeyeen aqoonyahanno ka tirsan Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage sannadihii 2020 iyo 2021, iyo sidoo kale waraysiyo lala yeeshay daneeyayaasha tiirdhexaadka u ah caddaaladda oo sannadkan horraantiisii la qaaday. Cilmibaarista uu Machadka Heritage sameeyay 2021 oo ay korjoogtaynayeen qoraayada daraasadda "Dibudhiska Nidaamka Cadaaladda Burburtay ee Soomaaliya (Rebuilding Somalia's Broken Justice System" ayaa sees u ah gorfaynta qaabdhismeedka cilmibaadhistan. Muddadii la qorayay cilmibaadhistaan, waxa uu qoraagu waraystay Guddoomiyaha Maxakamadda Sare ee Dalka, Guddoomiyeyaasha Maxakamadaha Sare ee Puntland iyo Koonfurgalbeed, Guddoomiyaha Maxakamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir, Guddoomiyaha Guddida Madaxabannaan ee Dibu-eegista Dastuurka iyo sidoo kale saraakiil sare oo Wasaaradaha Caddaaladda ee Dowladda Federaalka, Puntland iyo Koonfurgalbeed ka kala tirsan.

Waxaa kale oo uu qoraagu xigasho ku sameeyay diiwaanno tira badan oo ay ka mid yihiin dhugmentiyada hay'adaha dowladda, sida Wasaaradda Caddaaladda, Golaha Wasiirrada iyo Golaha Wadatashiga Qaranka, kuwaasi oo ka wada shaqaynaya dibudhiska garsoorka. Waxa kale oo uu xigasho ku sameyay dastuurrada dalal kale oo federaal ah, sooyaalka garsoorka Soomaaliya, Dastuurka Kumeelgaarka ah iyo qodobbadiisa la xiriira garsoorka iyo ku dhaqanka sharciga. Waxa sidaas oo kale la gorfeeyay warbixinno uu Machadka 'Max Planck Institute for Comparative Public Law and International Law' ka sameeyay geeddisocodkii qabyo-qoraalka Dastuurka Kumeelgaarka ah. Sidaas si la mid ah, waxa uu qoraagu daraaseeyay tusaaleyaal caalami ah, oo ay ka mid yihiin hannaanka Koonfur Afrika ee dibudhiska garsoorka iyo ku dhaqanka sharciga, hawlgalladii Qaramada Midoobay ee ku saabsanaa Balkans-ka Yugoslavia iyo diiwaannada Guddiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha ee ku salaysan dibudhiska nidaamyada caddaaladda ee burburay. Xigashooyinkaas waxaa ugu muhiimsanaa diiwaanka 'Habdhiska Hawlgalka' (Operational Framework), oo inkast oo uu diiradda saarayay daneeyayaasha caalamiga ah, haddana bixiyay aragtiyo qiimo leh. Sahan-baariseedkan baaxadda leh waxa uu qoraaga u sahlay in uu muuqaal buuxa ka bixiyo garsoorka Soomaaliya iyo doorkiisa ku aaddan hirgelinta ku dhaqanka sharciga.

Iyada oo la isku dhafayo macluumaadka laga helay ilahaas kala duwan, qoraagu wuxuu weeleeyay xaaladda ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya, isaga oo si gaar ah u muujinaya doorka muhiimka ah ee garsoorku ku yeelan karo nidaamka federaalka ah ee khilaafaadku xuddunta u noqdeen.

Cilmibaadhistani waxa ay falanqaynaysaa hababka ilaa iyo hadda loo maray dibudhiska garsoorka, iyada oo ku soo afmeeraysa talobixinno siyaasadeed oo ku saabsan dhismaha hay'ad garsoor oo ilaalin karta ku dhaqanka sharciga. Inkasta oo laga yaabo in aanay talooyinku wada cusbayn, haddana waxa uu qoraagu rejaynayaa in cilmibaadhistan laga dheefi doono aragtiyo cusub oo wax weyn ku biiriya dibuhabaynta garsoorka Soomaaliya.

# 4. Sareeynta Sharciga

Inkasta oo ay aqoonyahanno iyo ururro kala duwani ku dhaqanka sharciga u qeexeen siyaabo kale geddisan iyaga oo adeegsanaya afaf kala jaadjaad ah, haddana dulucda qeexitaanandoodu waa isku wada mid oo hal nuxur ayay wada gudbinayaan. Halka qeexitaan ee sida weyn loogu qancay waa qeexitaanka uu 2012 ansixiyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, kaas oo sheegaya in sarreeynta sharcigu timaaddo marka "dhammaan dadka, hay'adaha, xarumaha dawliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay, oo ay ku jirto dawladda lafteedu, u hoggaansan yihiin xeerar ku dhisan caddaalad, sinnaan iyo dhexdhexaadnimo oo iyaga oo aan la kala takoorayn uu sharcigu xaqooda u wada ilaalinayo si siman."[2] Mashruuca Caddaaladda Adduunka (World Justice Project) ayaa bixinaya qeexitaan xiiso badan leh, kaasi oo ku dhaqanka sharciga ku sifaynaya "nidaam sharci oo waara, hay'ado, xeerar iyo waajibaad bulsho oo ku qotama afartaan tiir ee mabaadi'da caalamiga ah oo kala ah: islaxisaabtan, shuruuc caddaalad ku salaysan, falasafado dowladeed oo dhiirrigalinaya islaxisaabtanka iyo daahfurnaanta iyo caddaalad dhexdhexaad ah oo cid waliba heli karto."[3] Fasiraad kasta oo laga bixiyo ku dhaqanka sharciga, waxa uu nuxurkeedu ku soo ururayaa in ay tahay in qof kasta lagula xisaabtamayo oo ay qabanayaan shuruuc cad-cad oo si guud loo dejiyay iyo xeerar si siman loogu dhaqmayo oo garsoor madaxbannaan uu xukumayo.

Haddaba, u sinnaanta fulinta shuruucda iyo madaxbannaanida garsoorku waxa ay lgama maarmaan u yihiin dhawrista ku dhaqanka sharciga. Waxaa xusid mudan, in ay mabaadi'dani aad ula jaanqaadayaan kuwa uu Islaamku ka qabo caddaaladda ee aan hore uga soo hadalnay.

Cimibaadhistu waxa ay milicsanaysaa taariikhda ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya, waxa ayna u kuurgalaysaa hay'adaha ku xusan Dastuurka Kumeelgaarka ah ee ay tahay in la dhiso. Intaas kadib, waxa ay qiimaynaysaa xaaladda ay hadda ku suganyihiin hay'adahaasi marka loo eego bixinta adeegga cadaaladeed. Waxa ayna sahaminaysaa nidaamyo maxakamadeed oo daraasaddu soo jeedineyso, kuwaas oo sii xoojin kara qaabdhismeedkan. Ugu danbayn, waxa ay daraasaddu bixinaysaa talo-bixinno dhaqangal ah si sees adag loogu taago hannaanka ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya.

2. G. A. Res. 67/1, ¶2 (Nov. 30, 2012).
3. Waa maxay doorka ku Dhaqanka Sharciga? Mashruuca Caddaaladda Adduunka, ee May 12, 2024.

# 5. Taariikhda Ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya[4]

Weligeedba aragtida sarreeynta sharcigu kama hanaqaadin Soomaaliya, oo way gabidhaclayneysay inta badanna wax jiraba ma ahayn.[5] Waxaana qofkasta oo si fiican ugu kuurgala taariikhda Soomaaliya uu ogaanayaa in ay dowladihii kala danbeeyay, marka laga soo bilaabo 1969 ay u hoggaansanaanta ku dhaqanka sharciga ka door bideen danaha foolaadka siyaasadda iyo sugidda amniga iyo kaladanbaynta. Inkasta oo ay "amniga iyo kaladanbayntu" yihiin halbeeggayo muhiim u ah ku dhaqanka sharciga, haddana keligood doorkaas ma buuxin karaan.

Wixii ka horreeyay gumaysiga, waxa ay bulshada Soomaaliyeed ahayd qabiillo kala madaxbannaan oo isku maamula xeer-dhaqameed soo jireen ah. Xeerka waxa gacanta ku hayay garsooreyaal dhaqan oo loo yaqaanno xeerbeegti, kuwaas oo si dhex ah u xallin jiray khilaafaadka bulshada. Inkasta oo ay bulshooyinka Soomaaliyeed lahaayeen habab sarreeyn sharci, oo uu xeerku xataa qabto oo xakameeyo madax-dhaqameedka, haddana waxa ay xeerarkaasi diiradda saari jireen arrimaha qabiilka dhexdiisa ah, inta bandanna fikrad kama bixineeyn wixii ka baxsan xuduudda beeshaasi. Iyada oo ay qabiilladu isu maamuli jireen si kala madaxbannaan, haddana waxa xuddun u ahaa is-ixtiraam wadaag ah iyo martiqaad ma guuraan ah kolka aanay jirin colaado kala irdheeyaa.

Gumaysataashii reer Yurub waxa ay kala daadiyeen dabarradii iyo xeer dhaqameedkii qabiillada Soomaaliyeed, iyaga oo iska indhatiraya caadooyinkii iyo xeerarkii maxalliga ahaa oo dajistay sharciyo jujuub ah oo ay ku xakamaynayaan bulshooyinkii ay qabsadeen, oo aanna marnaba u aabbayeelin dhawrista caddaaladda. Waxaa la dhisay maxkamado gumaysi, oo ay ujeeddadooda kowaad ahayd ilaalinta xukunka iyo kaladanbaynta, taas oo aan caddaaladda tixgelin badan siineyn, waxa ayna iska indhotireen mugga iyo maqaamka bulshada Soomaaliyeed.

Kadib markii ay Soomaaliya xorriyadda qaadatay 1960 gumaystayaashii hore waxa ay damceen in ay dowladda cusub ka caawiyaan aasaaska garsoor madaxbannaan si loo kobciyo ku dhaqanka sharciga. Si kastaba ha ahaatee, inkasta oo ay maxkamaduhu bilowgii u muuqdeen kuwo si madaxbannaan u shaqaynaya, haddana dadaalladoodi markiiba way dhicisoobeen, waxa ayna ku guuldarraysteen in laga dhaxlo hay'ado sharci iyo dhaqan-sharciyeed islaxisaabtan ku salaysan oo waara. Hoggaamiyeyaashii siyaasadda ee waagaasi waxa ay shaki weyn ka qabeen danta ugubka ah ee ay reer galbeedku ka lahaayeen in ay dadweynaha ka difaacaan kalitalisnimada, waxa ayna ku xagaldaaciyeen dadaalladaasi musuq-maasuq iyo wax-isdabamarin beelaysan, taas oo meesha ka saartay horumar kasta oo loo qaadi lahaa dhanka dhidibba u aasidda ku dhaqanka sharciga.

4. Dalkii lagu magacaabi jiray Soomaaliya waa in aan lagu khaldin qarankii Soomaaliya ee ka jiray Geeska Afrika, halkaas oo laga yaabo in sharciga laga dhaqmaa ahaa xeerka wixii ka horreeyay gumaystayaashii reer Yurub.
5. Wax yar ka dib xilligii xornimadda oo ay garsoorayaasha Muqdisho u badnaayeen shisheeye, waxa jiray sababo sharciga looga didayay.Tusaale ahaan, maxkamadihii Soomaaliya ee waagaasi waxa ay awood u lahaayeen xallinta khilaafaadka ku lidka ah dowladda, iyada oo aan dan laga lahayn caddaaladda.

Markii uu Jeneraal Maxamed Siyad Barre dalka afgambigii xukunka ciidan ku qabsaday 1969 isaga iyo dowladdiisii kacaanku waxa ay maarkiiba u xuubsiibteen kalitalisnimo, iyaga oo aan wax tixgalin ahna siinnin ku dhaqanka sharciga,[6] waxa uu awooddii dowladnimada u adeegsaday cabbudhinta mucaaradka iyo xakamaynta dadweynaha. Tallaabooyinkii foosha xumaa ee uu Siyaad Barre kula kacay garsoorka waxa ugu caansanaa in uu aasaasay Maxakamadda Badbaadada Qaranka oo ahayd hay'ad ka madaxbannaan nidaamka garsoorka, taasi oo ay gacanta ku hayeen ciidammo militari iyo saraakiil nabadsugid ah oo aan lahayn xirfad garsoor.

Maxkamadahani waxa ay ka garniqi jireen kiisas isugu jira mucaaradnimo siyaasadeed iyo xatooyo xoolo dowladeed, kamana jirin wax sharci ah oo ay isku difaacaan eedaysanayaashu.[7] Qareennimada inteeda badan waxay ahayd magac-uyaal, xukunnaduna waxa ay ahaayeen kuwo degdeg ah[8] oo ay ka soo baxaan xukun ciqaabeedyo, mararka qaarna waxa ka soo bixi jiray xukunnon dilal toogasho ah oo isla markiiba la fuliyo.[9]

Marka laga yimaaddo Maxkamadda Badbaadada Qaranka, waxa uu Siyaad Barre aasaasay Hay'adda Nabadsugidda Qaranka (NSS), oo ka dabqaadanaysay sirdoonkii Midowga Soofiyeetiga (Soviet KGB), waxa ayna ujeeddadeedu ahayd in la helo awoodo ka madaxbannaan garsoorka oo lagu beegsado cid kasta oo mucaarad loo arko. Si kooban, cabudhinta garsoorka iyo amnigu waxa ay Soomaalida bareen casharro taban, iyaga oo aamminay in dadka talada hayaa si naxariis darro ah ugu tagrifali karaan awoodaha dowladnimo.

Kadib markii uu Siyaad Barre dhacay 1990 Soomaaliya waxa ka qarxay dagaallo sokeeye oo salka ku haya kacdoon beeleedyo, kuwaas oo dhalanrogey muuqaalka siyaasadda Soomaaliya. Qaramada Midoobay, dalalka deriska ah iyo sidoo kale kuwo qaaradaha fogba waxay marar badan isku dayeen waanwaan nabadeed[10], balse waxa ay colaaduhu socdeen ku dhowaad toban sano.[11]

---

6. Mid ka mid ah waxyaalaha ay jiilalka Soomaalidu u qoommameeyaan dowladdii Siyaad Barre ayaa ah in dalka intiisa badan aysan ka jirin dambiyo muuqda, gaar ahaan magaalada Muqdisho. Xaqiiqatan, "sharciga iyo kaladanbayntu," waligeedba way jireen, xataa xilliyadii dowladdii siyaasadda adkayd. Tusaale ahaan, xataa dhowrkii toddobaad ee u dhexeeyay xadhiga iyo dilka 14-kii wadaad ee sida cad u qaaddacay meelmarinta sharcigii cusbaa ee qoyska ee simayay ragga iyo dumarka sannadkii 1974, magaalada kamay dhicin wax qalalaase ama dembiyo waaweyn ahi. Waxba la iskama waydiin halkii ay dadweynuhu ka taagnaayeen; haddana magaaladu waxa ay ahayd mid si weyn u sharciga ugu hoggaansan, mana jirin falcelin baahsan oo ay shacabku ku muujiyeen diidmadooda, sababta oo ah cabudhintu waxa ay gaadhay heer la is dhaqaajin kari waayo. Haddaba, in magaaladu ahayd mid deggan oo sharciga u hoggaansan xilligii taliskii Siyaad intiisa badan kama turjumayso in uu jiray ku dhaqan sharci.
7. Eeg Soomaaliya—dhacdo daraaseedkii Helen C. Metz, ee Qaybta Cilmibaarista Federaalka, Madxafka Shirka, 1992.
8. Sida laga soo xigtay ugu yaraan laba qof oo ay arrintu khusayso, fulinta xukunnada degdega ah ayaa weli lagaga dhaqmaa Soomaaliya, gaar ahaan kiisaska argagixisada iyo kuwa dilalka ah ee ay ku lug leh ciidamada qalabka sida, kuwaas oo ay qaadaan Maxkamadaha Ciidamadu. Run ahaantii, mid ka mid ah daneeyayaasha ayaa in maxakamdda ciidamada lagu xukumo dadka shacabka ah u arka in ay ka hor imaaneyso qodobka 127 ee Xeerka Ciqaabta.
9. Tusaale ahaan, 1975, waxa la xidhay, oo la maxakamadeeyay 10 wadaad oo Soomaaliyeed ah, waxaana lagu xukumaday dil-toogasho muddo 10 maalmood gudahood ah. wadaaddani waxa ay ka soo horjeedeen sharcigii qoyska ee Siyaad Barre xilligaas ansixiyay. Ka eeg,"Today in HISTORY: Ten sheikhs executed by Siad Barre gov't for opposing secular family law," https://hiiraan.com/news4/2023/Jan/189613/today_in_history_ten_sheikhs_executed_by_siad_barre_gov_t_for_opposing_secular_family_law.aspx.
10. Ku dhawaaqidda goonni-isutaaga Somaliland iyo Puntland oo gaar isu maamusha iyo qabqablayaashii qabiilka ee ka jiray dalka intiisa kale sagaashameeyadii, ayaa si fiican u muujinaya in ay meesha ka baxday kalsoonidii u dhexeysay beelaha. Kalsooni darradaas ayaa wali Soomaaliya ka taagan, waligeedna wax ka beddelaysay saaxadda siyaasadda. Muddadii qallafsaneed ee ka dambaysay dhicistii taliskii Barre ilaa iyo maanta waxa ay noqotay beer midhaheeda ku biqlaan danaysi siyaasadeed, taas oo siyaasiyiinta uga dhignayd saanad xooggan oo ay ku muquuniyaan xubin kasta oo ka soo jeedda qabiilka ay is hayaan. Taasi waxa ay horseedday khilaaf siyaasadeed oo burbur dhaliyay iyo khilaafaad joogto ah oo ummadda aafeeyay tan iyo markii la riday taliskii Barre, oo laga joogo dhowr iyo soddon sannadood.
11. Sida halkan loo adeegsaday, dagaalka sokeeye ee Soomaaliya ka dhacay waxa qeexitaankiisa lagu soo koobaa dagaal qabiil. Si kastaba ha ahaatee, colaadda sokeeye ee ku bilaabatay hab qabiil ayaa tan iyo waagaas u xuubsiibatay shabakad musuqmaasuq oo ku tiirsan diini ah iyo sheegashooyin qabiil si ay u helaan taageero bulsho oo ciriiri ah oo ay xukunka ku qabsadaan ama ku ilaashadaan. Waxaa laga yaabaa in qaarkood ay ku doodaan in Somaliland iyo Puntland ay sidoo kale saameyn ku lahaayeen qabqablayaasha dagaalka. Si kastaba ha ahaatee, dooddan ayaa ka maqan mudnaanta.

Sannadkii 2000, Soomaaliya waxa ay u kala qaybsanayd gobollo, sida Somaliland oo goonni-goosad ah, Puntland oo gaar iskeed isu maamusha iyo maamullo kooban oo ay qabqableyaal dagaal gacanta ku hayaan, sida caasimadda Muqdisho iyo guud ahaan Koonfurta iyo Gobolada Dhexe ee Soomaaliya. Intii uu qalalaasuhu socday waxa jiray dadaallo lagu dhisay maamullo gaar ah oo ay ugu horraysay Somaliland oo la aasaasay 1990-naadkii iyo Puntland oo la dhisay 1998. Meelihii ay qabqableyaasha dagaalku haysteenna, waxa 2006 ka bilaabmay maxkamado qabiil ku salaysan oo wadaaddo maamulaan[12] oo bixiyay adeegyo garsoor.[13] Maxkamadahan maxalliga ahi waxa ay markii dambe aasaaseen Midowgii Maxkamaha Islaamiga ah.[14]

Qarnigani waxa uu Soomaaliya ula beryay horumar siyaasadeed oo ugub ah, oo ka bilaabmay Shirkii Carta ee 2000[15] iyo yagleelidda Dowlad Qaran oo Kumeelgaar ah (TNG),[16], waxaana ku xigay Shirkii Dibuheshiisiinta Qaran ee Soomaaliya oo ay IGAD soo qabanqaabisay 2002, kaasi oo ay ka dhalatay Dowladda Kumeelgaarka ah ee Federaalka (TFG).[17] Xilligan waxa soo shaacbaxay caqabado tiro badan oo ay ka mid yihiin dhalashaddii Maxkadaha Islaamiga ah, duullaankii Itoobiya ee Maraykanku badhitaarayey si ay u burburiyaan Maxkadaha Islaamiga ah, iyo ugu dambayn soo ifbixistii al-Shabaab oo ah awood saamayn weyn ku leh koonfurta Soomaaliya.

Inkasta oo ay al-Shabaab leedahay qaar ka mid ah hababaka xallinta murannada,[18] haddana nidaamkeeda dullaynta ahi waxa uu ku tuntay sharafta nidaamka garsoorka. Waxa ay kooxdani dhaqangalisay faham/fasir Shareeco oo ay iyadu allifatay oo ay ku fuliso ciqaabo bahalnimo ah sida dilal meel fagaare ah, googooynta xubnaha jidhka, iyo karbaash arxan darro ah. Kuwaas oo nidaamkeeda ka saaraya ku dhaqanka aragti kasta oo nidaam sharciyeed. Hab-dhaqannada maamulka al-Shabaab waa kuwo ku dhisan argagixisanimo iyo muquunin arxan darro ah, umana jihaysna in ay la timaaddo dadaallo dhab ah oo ay ku dhisayso nidaam caddaaladeed ama hannaan sharci la wada aqbali karo.

Sidaas darteed, inkasta oo ay bixiyaan dadaallo ay ku xalliyaan khilaafaadka maxalli ah, haddana maamulkooda dulmiga iyo dabeecadda rabshadda ah ku dhisani waxa uu baabi'iyey oo uu suurad xumeeyay muuqaalka nidaam sharciyeed kasta oo shaqaynaya yeelan karo.

Wajiga siyaasadeed ee hadda ka jira Soomaaliya waxa uu dhashay Sibtember 10, 2012 oo ah markii la dhisay dowladdii kowaad ee lagu yagleelay nidaamka federaalka ah ee dhowaan la qaatay oo ku qeexan Dastuurka Kumeelgaarka ah.

---

12. Maxaakimta qabiilaysan ee islaamiga ah ayaa markii danbe u midoobay la dagaallanka qabqablayaasha dagaalka, oo dhistay Midowga Maxkamadaha Islaamiga ah.
13. Waxaa laga yaabaa in qaarkood ay ku doodaan in Somaliland iyo Puntland ay sida oo kale saameyn ku lahaayeen qabqablayaasha dagaalka. Si kastaba ha ahaatee, dooddani waa mid bilaa nuxur ah. Si ka duwan qab-qablayaashii beelaha kale, ee ku qanacsanaa awooddooda, mararka qaarna ay isku dhacayeen dhiggooda kale ee ay Muqdisho ku loollamayeen, waxa ay madaxda Puntland iyo Somaliland si firfircoon isugu taxallujiyeen in ay dhistaan maamullo madaxbannaan. Waxa ay diiradda saareen dhisidda hay'ado dowladeed, waxaanay xuduudahooda ka aasaaseen qaab-dhismeedyo siyaasadeed oo waaritaan leh.
14. Bilowgii Maxakamadaha Islaamiga ah, https://www.c-r.org/accord/islam-and-somali-social-order
15. Lortan, F. (2000). Rebuilding the Somali State. African Security Review, 9(5–6), 94–103. https://doi.org/10.1080/10246029.2000.9628085; Xoojinta ixtiraamka madaxbannaanida Soomaaliya, xornimada, midnimada, iyo golaha amniga Soomaaliya waxa ay mar kale xaqiijinaysaa in ay ka go'an tahay deggenaansho dhammaystiran:Geeddisocodkii nabadda ee Carta,https://unis.unvienna.org/unis/en/pressrels/2001/sc7190.html
16. Geeddisocodka Caddaaladda Kumeelgaarka ah: Soomaaliya, https://atjhub.csvr.org.za/somalia/
17. Ibid.
18. Eeg, Tusaale ahaan, "Warbixinta Dalka Soomaaliya ee ku saabsan Dhaqannada Xuquuqda Aadanaha ee 1998," waxaa soo saartay Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka, https://1997-2001.state.gov/global/human_rights/1998_hrp_report/somalia.html, bookhday May 19, 2024.

Si kastaba ha ahaatee, tan iyo markii la aasaasay Dowladda Federaalka ee Kumeelgaarka ah, taariikhda maamulka dowladnimo Soomaaliya ee curdinka ah waxa curyaamiyay hoggaan jilicsan oo ku fashilmay in uu dhiso hay'adaha iyo habraacyada lafdhabarta u ah kobcinta dowladnimo dhab ah ama ku dhaqanka sharciga. Maanta waxay Soomaaliya la tiiceeysa saboolnimo baahsan, kala qaybsanaan bulsho, iyo sarreeyn la'aan sharci oo dhaba-dheeraatay, taasi oo ay uga sii dareen musuqmaasuq [19] ay ku mameen foolaadka siyaasaddu iyo isku tagrifalka ka dhex aloosan beelaha Soomaaliyeed.

# 6. Ku dhaqanka sharciga iyo Dastuurka Kumeelgaarka ah

Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya wuxuu tilmaamayaa" 'Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT)' kadib, awoodda oo dhan waxa leh Shacabka, waxa uuna u isticmaalayaa si toos ah iyo isaga oo u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda" (qodobka 1aad.) Qodobkani waxa uu ku nuuxnuuxsanayaa doorka muhiimka ah ee ay shacabku ku leeyihiin dawladnimada iyo waxyaabaha looga baahan yahay in ay dowladdu ku dhaqanto si ay ugu dhex shaqayso xayndaabka Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

Waxa intaas dheer, qodobka 2-aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa uu dhigayaa sidan: "Lama soo saari karo sharci aan waafaqsaneyn Mabaadi'da guud ee Shareecada Islaamka iyo Maqaasiddeeda," isaga oo hoosta ka xarriiqaya in ay Shareecada Islaamku udub dhexaad u tahay nidaamka sharci ee Soomaaliya. Inkasta oo uu Dastuurku ballanqaadayo ku tiirsanaanta Shareecada, waxa kale oo uu shacabka awood u siinayaa in ay jaangooyaan shuruucda dalka asaga oo ku dhiirrigalinaya in ay si dimuqraadiyaddi ah uga qaybgalaan maamulka dalka.

Sidaas oo kale, Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa uu sii adkeeynayaa xayndaabkan-sharci waxa uuna oranayaa: "Dastuurka Soomaaliya waxa uu dhiirrigelinayaa … talinta sharciga," (qodobka 3). Qodobkani waxa uu xoojinayaa muhiimadda ay leedahay in la sameeyo nidaam sharci ah oo shuruucda loogu dhaqmo si caddaalad ah oo isku mid ah isla markaana waafaqsan halbeegyada Shareecada Islaamka iyo kuwa dimuqraadiga ahba.

---

19. Tusaale ahaan, Halbeegga Hay'adda Daafurka Musuqmaasuqa ee Caalamiga ah ayaa sannadkii 2023 qiimaysay heerarka uu musuqmaasuqa ee 180 dal, waxaanay Soomaaliya ka gashay kaalinta 11. Eeg https://www.transparency.org/en/countries/somalia. Soomaaliya waxa kaalinta 2-aad u gashay dalalkii dunida ugu musuqmaasuqa badnaa 10-kii sano ee la soo dhaafay(Koonfurta Sudan ayaa hal sano ka hoos martay Soomaaliya– 2020).

# 7. Hirgelinta Ku dhaqanka sharciga

## 7.1 Astaynta Awoodaha Federaalka

Marka laga hadlayo nidaamka dowlad federaal ah, awoodda waxaa loo qaybiyaa dowladda dhexe ee federaalka iyo dowlad goboleedyada. Maadaama la qaatay hannaanka federaal ah, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya waxa uu ku baaqayaa in awoodda dowladeed habkan loo qaybiyo. Awoodaha qaar, gaar ahaan kuwa loo yaqaan "awoodaha gaarka ah", waxay si cad ugu kala qaybsanyihiin dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Haseyeeshee, waxa jira meelo cayiman oo ay dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyaduba si siman uga wada shaqaynayaan, waxaana loogu yeeraa "awoodaha la wadaago". Marka xaaladahan oo kale la eego, nidaamyada federaalka ahi waxa ay cuskadaan qodobka sarreeynta, kaas oo xaqiijinaya in sharciga Dawladda Federaalku, sida uu dhigayo Dastuurku, uu mudnaanta ka leeyahay kuwa dawlad goboleedyada. Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya oo caddaynaya arrintaas ayaa oranaya "Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sharciga ugu sarreeya dalka."[20] Sidaas darteed, taas waxa uu dastuurku uga golleeyahay in uu dheellitiro awoodaha u dhexeeya dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada.

Shuruudaha ugu muhiimsan ee looga baahan yahay ku dhaqanka sharciga waa dowlad shacabka u adeegta kuna dhaqanta sharciyo cad cad oo caddaalad iyo sinnaan ku dhisan. Xaydaabkan sahrci waxa uu dhiirrigalinaya islaxisaabtanka waxa uuna dammaanad qaadayaa helista caddaaladda. Asal ahaan, dastuurku waa in uu si cad u qeexaa una qoondeeyaa awoodaha, isaga oo dhigaya seeska hay'adaha sharci ee jira oo dhan. Balse nasiib darro, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya waxa uu ku fashilmay in uu heerkaas gaaro. Waayo si cad uma kala qeexayo xuduudaha awoodda federaalka, waxa uunu ku guuldarraystay in uu si cad u kala qeexo awoodaha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada. Halkii uu ka bixin lahaa masuuliyado cadcad (inkastoo qaarkood iswaafaqi karaan) Dastuurku waxa uu madmadow galinayaa astaynta awoodaha, waxa uuna leeyahay "Awood walba waa in la siiyo hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta" (Qodobka 50aad), isaga oo aan bixinaynin wax halbeegyo ah oo ay go'aannadaasi raacayaan. Qodobka 51aad, ayaa arrimaha sii murginaya, isaga oo heer kasta oo dowladeed ka mamnoocaya "in ay qaataan awood ka badan tan dastuurku u qoondeeyey."

Waxaa hubanti la'aanta sii biiriyay qodobka 54-aad oo dhigaya in qeybsiga awoodda iyo kheyraadka ay "ka wadahadlaan oo ay ku heshiiyaan Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka". Si kastaba ha ahaatee, inkasta oo nidaamka federaalku Soomaaliya ka jiray in ka badan toban sano, haddana siyaasiyiinta Soomaaliya weli ma aynan dhammaystirin hannaankan wax qaybsiga.

---

20. Sida saxda ah, sharciga ugu sarreeya Soomaaliya waa Shareecada, laakiin dajiyeyaasha Dastuurka Kumeelgaarka ah ayaa doortay habaynta sharciga. Sida caadada u ah dunida Muslimka, dastuurka kumeelgaadhka ahi waxa uu dhigayaa in dastuurka iyo shuruucda loogu dhaqmo si waafaqsan qacaaddidda shareecada Islaamka. Run ahaantii, marka laga reebo in la soo jeediyay in garsoorayaashu la tashan karaan Shareecada, marka laga hadlayo xuquuqaha asaasiga ah (qodobka 40), waxaanu si cad ugu tiirsan yahay shareecada, isaga oo sheegaya in ilmo-iska soo rididdu sharci darro ka tahay Soomaaliya (Qodobka 15), sharciyadan oo dhan waxa qeexaya Dastuurka Kumeelgaarka.

Sidaas darteed, dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyaduba waxa ay inta badan ku dhaqmaan hadba sida ay iyagu u fasirtaan Dastuurka, weliba iyada oo aaney jirin wax hageyaal ah oo ka baxsan amarka madmadowgu ku jiro ee dhigaya in la qaato "heerka ugu wax ku oolsan". Tani waxa ay jaahwareer galisay sharciyadda shuruucda federaalka, gaar ahaanna wixii ka baxsan meelaha sida cad loo qeexay oo ay ka mid yihiin arrimaha dibadda, difaaca qaranka, socdaalka iyo jinsiyadda iyo siyaasadda lacagta. Sidaa si la mid ah, waxaa laga yaabaa in xeerarka ay dowlad goboleedyadu soo saaraan aanay lahayn aasaas sharci oo adag, taasi oo ka sii qaybqaadaneysa hubanti la'aanta ku gadaaman bay'ada sharci ee Soomaaliya.

Hannaanka faderaalayntu waa mid ku dhisan iskaashi iyo isu-tanaasul oo aan ku tiirsanayn gobannimada dowladeed oo si fudud loogu doodo. Inkasta oo ay dowlad goboleedyadu xaq u leeyihiin in ay maamushaan arrimaha gudahooda, haddana waa in ay u dhaqmaan hab taageeraya wadajirka qaranka. In ay diidaan in ay arrimaha heer qaran kala shaqeeyaan dowladda federaalka waxa ay mijaxaabineeysa mabaadi'da salka u ah faderaalnimada. Si loo dhiso nidaam federaal oo shaqaynaya isla markaana xasilloon, waa in ay dowlad goboleedyadu ka qaybqaataan wadahadallada si loo dhammaystiro hannaanka astaynta awoodaha. Haddii aanay jirin wadashaqayni, nidaamka federaalka Soomaaliya waxa uu qarka u saaranyahay halis xasillooni darro, taasi oo horseedi karta in lagu noqdo burburkii 1990-maadtaas oo ah masiibo ay tahay in uu dhinac kastaa ka fogaado.

## 7.2 Garsoor Madaxbannaan

Inkasta oo ay hay'ado badan oo dowladeed ka qaybqaataan ku dhaqanka sharciga, haddana dunida oo dhammi waxa ay isku waafaqsan tahay in garsoorku yahay laanta ugu muhiimsan aasaaska sharciga. Hufnaanta, kartida iyo dhexdhexaadnimada maxkamadaha ayaa lafdhabar u ah xaqiijinta ku dhaqanka sharciga. Maxkamuhu waxa ay fasiraan oo ay dabaqaan shuruucda si ay u dhawraan caddaaladda una xaqiijiyaan islaxisaabtanka. Sidaas oo kale, waxa ay muhiim u yihiin xakamaynta laamaha fulinta iyo sharci-dejinta, iyaga oo ka hortaga xadgudub kasta oo ka baxsan xuduudaha dastuuriga ah. Sarreeynta sharcigu ma aha oo keliya in ay saraakiisha dowladdu ku dhex shaqeeyaan xuduudaha dastuuriga ah, balse sidaas oo kale, waa in uu hagaa hab-dhaqanka muwaaddiniinta markasta oo ay shuruucdu caddahay si caddaalad ah oo isku mid ahna loo fulinayo.

Sidaas oo kale, garsoorku waxa uu ka qaybqaadan karaa xoojinta hay'adaha kale ee muhiimka u ah ilaalinta ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya. Tusaale ahaan, haddii ay garsooreyaashu dalbadaan in caddaymaha eedaysanayaasha si sax ah loo ururiyo loona xafido si loogu tixgeliyo kuwo la aqbali karo, dembi-baaheyaasha waxaa ku waajibeysa in ay buuxiyaan shuruudahaas. Sidoo kale, si dacwad-oogeyaasha loogu ilaaliyo in ay dacwadahoodu noqdaan kuwo waafaqsan sharciga, waxa ay garsooreyaashu hubiyaan in dhammaan heerarka kala duwan ee dacwadda la ilaaliyay ku dhaqanka sharciga, si loo xoojiyo hufnaanta nidaamka sharciga.

## 7.3 Garsoorka: Laanta Saddexaad ee Dowladda

Cutubka Sagaalaad ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ayaa qeexaya muhiimadda doorka garsoorka iyo awoodaha uu ku dhex leeyahay qaabdhismeedka dowladda Soomaaliya. Waxa uu ku baaqayaa in la dhiso Maxakamadda Sare iyo Maxakamadda Dastuuriga ah, isaga oo isla markaa dhawraya mabda'a dibu-eegista garsoorka. Sida lagu faahfaahiyay Qodobbada 105aad ilaa 109aad ee Dastuurka, habkan muhiimka ahi waxa uu maxkamadaha u ogolaanayaa in ay qiimeeyaan dastuurinimada shuruucda iyo falalka dowladda. Dibu-eegista garsoorku waa seeska ku dhaqanka sharciga, waxa ayna hubinaysaa in dhammaan tallaabooyinka laamaha fulinta iyo sharci-dejintu ay waafaqsan yihiin halbeegyda dastuuriga ah.

Qodobka 3-aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa uu sii adkaynayaa qaabdhismeedka dowladda federaalka oo u kala baxda saddex laamood: fulinta, sharci-dejinta iyo garsoorka. Laan kastana waxa ay u taagan tahay in ay ka shaqayso dheellitirka laamaha kale oo ay ku ilaaliso ku dhaqanka sharciga. Laanta fulintu waxa ay ka masuul tahay u sinnaanta sharciga fulintiisa, iyada oo hubinaysa in sharciga si isku mid ah loogu dabaqo shaqsiyaadka, xarumaha iyo hay'adaha dowladdaba oo aan cidna looga haybadaysan cidnana lagu dulmiyin. Marka, garsoorku waxa uu ka shaqeeyaa xallinta murannada isaga oo go'aannadiisa ku salaynaya sharciga. Waajibaadkan isku lammaan waxaa kala leh laamaha fulinta iyo garsoorka, iyada oo laanta fulintu ay leedahay waajibaadka u fulinta sharciga si loo siman yahay, halka laanta garsoorku ka leedahay waajibaadka xukun caddalaad ku dhisan; iyaga oo ku taagan mabda'a aasaasiga ah ee sheegaya in aanu qofna sharciga ka sarreeynin oo ay cid weliba u hoggaansanaato. Intaas waxa dheer, in mabda'a sarreeynta sharcigu uu dabar xakamaynaya u yahay awoodaha booliiska, xeer-ilaaliyeyaasha iyo garsooreyaashaba.

Waxaa wax laga qoomamoodo ah in labadii maamul ee ugu horreeyay dowladda federaalka Soomaaliya ay awood u lahaayeen in ay maamulaan qayb Muqdisho ka mid ah oo keli ah.[21] Inkasta oo ay jireen dadaallo aan guulaysan oo lagu doonayay in lagu ciribtiro kooxaha (xagjirka ah) hubeysan, xukuumadahan oo ay weheliyaan saaxiibadooda caalamiga ahi waxa ay diiradda saareen hanashada ammaanka caasimadda. Inkasta oo horumar la taaban karo laga sameeyay dhanka horumarinta hay'adaha muhiimka ah, sida madaxtooyada, baarlamaanka, wasaaradaha kala duwan iyo weliba laamaha fulinta sharciga, balse garsoorka lama siinin daryeelkii uu mudnaa. Waxa ayna hindisayaasha badankoodu ku koobnaayeen dibudayactirka dhismayaasha gaboobay ee maxkamadaha darajada kowaad iyo rafcaanka gobolka Banaadir iyo sidaas oo kale dibudhiska Maxkamadda Sare ee Dalka, iyada oo goldaloolooyin waa weyni weli ku gadaaman yihiin dibudhiska hay'addan muhiimka ah.

21. Marka kaliya ee laga dhabeeyay la dagaallanka al-Shabaab waa xiligii maamulka hadda jira. Inkasta oo ay jireen guulo la taaban karo iyo dibudhac aan wanaagsaneyn, haddana rejada iyo yididiilada shacabku waa waxa kaliya ee xilligii Xasan Shiikh lagu jabiyey maleeshiyada al-Shabaab.

Caqabadaha ku xeeran dibudhiska garsoorka Soomaaliya waxa ay ka soo farcamaan dhowr arrimood oo ay ku jiraan, qaddarin la'aan ku aaddan kaalinta garsoorka, khilaafaadka siyaasadeed ee joogtada ah ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada iyo danayn la'aan guud oo ku saabsan ilaalinta ku dhaqanka sharciga.

Waxa intaas dheer, in aan garowshiyo badanba loo haynin dammaanad qaadka dastuuriga ah ee la xiriira madaxbaannaanida garsoorka. In kasta oo uu Golaha Wadatashiga Qaranku (NCC)[22] hordhaca heshiiskiisii siyaasadeed ee Diiseember 28, 2022, uu ku qiray baahida loo qabo madaxbannaanida garsoorka, kaas oo xoogga saarayay sida ay madaxbannaanida garsoorku lama huraanka ugu tahay kalsoonida dadweynaha, haddana marnaba heshiisku ma soo hadalqaadin waajibaadka dastuuriga ah ee ay madaxbannaanidaasi u baahan tahay.

Intaas waxa sii dheer, in maqaamka garsoorka oo ah laanta saddexaad ee dowladda uu noqday mid ay si weyn iskaga indhatireen doodaha siyaasadeed ee Soomaaaliya ka socdaa. Tani waxa ay keentay in garsoorku aanu lahayn miisaaniyad u gaar ah oo uu dhaqaale ahaan ku tiirsanaado laanta fulinta, taasi oo sii curyaamisay madaxbannaanidiisa. Inkasta oo aanay warbixinaha si toos ah ugu dirin Wasiirka Caddaaladda iyo Dastuurka, haddana waxa uu garsoorku miisaaniyad ahaan ku tiirsan yahay Wasaaradda Maaliyadda.[23] Ku tiirsanaantani waxa ay muujinaysa sida ay laamaha siyaasaddu ugu guuldarraysteen in ay hay'adda garsoorka ula dhaqmaan in ay tahay lammaane la siman oo xagga dowladnimada ah, taasina waxa ay ku tumatay madaxbannaanidii garsoorka. Sidaas darteed, qaabdhismeedka dowladda Soomaaliya weli waa qabyo maadaama uu garsoorku weli si buuxda u hoos joogo laamaha xeer-dejinta iyo fulinta. Sida dhabta ah, dowladda federaalka Soomaaliya waxa ay u dhaqantaa sidii nidaam laba laamood ka kooban, iyada oo garsoorkuna uu u shaqeeyo sidii farac ka tirsan laanta fulinta.

Isu-dheellitir la'aantani ma wiiqayso madaxbannaanida garsoorka oo keli ah, balse sidaas oo kale waxa ay muujinaysaa baaxadda dayacaadda lagula kacay doorka garsoorka oo ah saldhigga dowladnimada. Guud ahaan taariikhda federaalka Soomaaliya, saddexdii xukuumadood ee soo maray midna ma ilaalin mabaadi'da kala-soocidda awoodaha ama madaxbannaanida garsoorka, taas oo jebineeysa Dastuurka Kumeelgaarka ah.[24]

---

22. Waa in maanka lagu hayaa in aanay Puntland iyo Somaliland qayb ka ahayn Golaha Wadatashiga Qaranka. Puntland ayaa diidday in ay ka qaybgasho golahaas, Somaliland-na way ka maqan tahay dhammaan arrimaha Soomaaliya. Inkasta oo uu Golaha Wadatashiga Qaranku keenay madaxweynaha hadda jira, haddana waxa ay u muuqataa aasaas dastuuri ah. Sida ku cad qodobka 132 ee Dastuurka KMG ah, "Dowladda Federaalka ama tan gobolada, xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka ama codsi ay saxiixeen ugu yaraan 40,000 oo muwaadiniin ah ayaa lagu bilaabi karaa habraaca wax ka beddelka." (Wuu sii xoojinayaa). Haddaba, dowladda federaalka ama xitaa dowlad-goboleedyadu way soo jeedin karaan waxkabeddelka. Golaha Wadatashiga Qaranku waxa uu ka kooban yahay madaxda dowlad goboleedyada, madaxda dowladda federaalka, iyo madaxweynayaasha shanta dowladood ee xubnaha ka ah federaalka, inkasta oo ay maqan yihiin madaxda laba dowlad goboleedyad oo xubno ka ah federaalka. Sababo muuqda dartood, Somaliland kama qayb qaadanayso arrimaha noocan ah. Maqnaanshaha Puntland waa mid bilaa cudur daar ah, xitaa haddii salkeeda la raadiyo waa mid sharci ah, sidaas darteed, ma noqon karto mid su'aalo la iska weydiiyo dhacdooyinkan. Sida oo kale, Golaha Wadatashiga Qaranku wuxuu u muuqdaa hay'ad bilaabi karta waxkabeddelka habraaca, iyada oo la raacayo macnaha qodobka 132 ee Dastuurka KMG ah.
23. Tusaale ahaan, waxaa miisaaniyadda 2023 ku jira $6.2 milyan shay oo loogu talagalay "Hay'adaha Garsoorka", oo hoos ku hoos jirta Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka, waanay ka sarraysaa kuwa xeer ilaaliyaha guud iyo garyaqaanka guud, waa laba fulineed oo kala duwan. Run ahaantii, qaabdhismeedka dowladeed ee hadda ka jira magaalada Muqdisho, waxa uu la mid yahay dowladdii Soomaaliya ee ka horraysay 1991, iyada oo dowlad goboleedyadu maxakamadihii qaranka u beddeleen maxkamado dawlad-goboleed, taas oo meesha ka saaraysa maxkamadaha federaalka.
24. Waxa la wada ogsoon yahay in qaar ka mid ah wasiirrada saddex maamul oo ka tirsan federaalka Soomaaliya ay sida oo kale xubno ka ahaayeen mid ka mid ah labada aqal ee sharci dejinta. Taasi waxay burinaysaa kala-saaridda awoodaha ee ku qeexan qodobka 3aad ee dastuurka KMG ah. Federaalnimadu waa nidaamka dowladeed ee la isku waafaqay, waana udubdhexaadka dastuurka. Sidaas darteed, waa in meesha laga saaro qodob kasta oo ka hor imanaya.

Ka saarista garsoorka shaqooyinkii xuddunta u ahaa dowladda, waxa ay weli caqabad weyn ku tahay dhismaha qaran si buuxda u shaqaynaya iyo in sarreeynta sharcigu ka hanaqaaddo Soomaaliya. Nasiib darro, qaylodhaanta shacabka ee arrintan ku saabsan waa mid kooban, maadaama inta badan Soomaalidu ay fahan xaddidan ka haystaan maamulka dowladnimo oo ay garsoorkana u arkaan in uu yahay qayb kale oo ka mid ah dowladda oo iyaga uun lagu cadaadiyo, halkii ay uga arki lahaayeen laanta majaraha u haysa xakamaynta awoodda hay'adaha siyaasadda.

## 7.4 Madaxbannaanida Garsoorka iyo Caddaaladda Shareecada Islaamka iyo Dowladnimada Casriga ah

Guud ahaan culimada Islaamku waxa ay isku raacsan yihiin in ay Shareecadu ku baaqeeyso helidda garsoor dhexdhexaad ah, ayna si xooggan uga soo horjeeddo xadhigga, xabsiga, ciqaabta sharci darrada ah iyo faragalin kasta oo xadgudub ku ah nolosha gaarka ah ee shakhsiyaadka.[25] Arrintanna waxaa sal u ah mabda'a berinimada asalka ah oo ah in qof walba loo arko in uu yahay mid aan dembi lahayn ilaa laga caddeeyo dembiilenimadiisa, taasi oo ay la socoto in qofka eedaysanaha ahi xaq u leeyahay in gartiisa si caddaalad ah oo degdeg ah uu u qaado garsoore dhexdhexaad ahi. Masuuliyadda ilaalinta mabda'ani waxa ay si buuxda dusha uga saaran tahay garsoorka, iyada oo saldhig u ah ku dhaqanka sharciga.

Dhexdhexaadnimada garsoorka oo iyadana muhiim u ah si la mid ah madaxbannaanidiisa ayey culimada islaamku ku sifeeyeen in ay tahay tiirdhexaadka caddaaladda, waxaana tusaale innoogu ah dhaqankii Nebi Maxammed (Sallallaahu Caleyhi Wasallam) iyo Saxaabadiisa. Haddaba halka ay madaxbannaanida garsoorku ka tilmaanto ka xor noqoshada saamaaynta faragelinta dibadda, dhexdhexaadnimada garsoorku, iyaduna waxa ay xooggga saartaa u caddaalad falka dhinacyada uu ka dhexeeyo muranka sharci[26] Xilligii Nebi Maxammed (Sallallaahu Caleyhi Wasallam) iyo in muddo ah kadibba, madaxbannaanida garsoorku ma ahayn arrin walaac ka jiro waxayna si fudud filashada dadku ahayd in ay garsoorayaashu noqdaan kuwo dhexdhexaad ah. Dhibaatada ka taagan madaxbannaanida garsoorka waxaa ay la kowsatay hoggaamiyeyaashii dambe ee kalitaliska ahaa, markaasi oo fikradda madaxbabaanida garsoorku ay noqotay dood adag.

Fikradda madaxbannaanida garsoorku, marka la eego sida ay ugu dhaqmaan dalal badan (sida Türkiye, Malaysia, Morocco, Botswana, South Africa, South Korea, India, Japan iyo dalal badan oo reer galbeed ah), taariikh ahaan waxa ay ka soo jeeddaa Axdigii Heshiiska England (Settlement Act in England) oo la meelmariyay 1701, kaasi oo lagu doonayay in garsoorka looga xakameeyo saamaaynta taban ee Boqorka.

---

25. Eeg, Muhammad Munir, "Xuquuqaha Asaasiga ah ee uu Nidaamka Xeerciqaabeedka Islaamku u dammaanad qaadayo Eedaysanaha," Hamdard Islamicus 45 Vol. XL, No. 4, 2017. Sida oo kale eeg, "Xeerciqaabeedka Islaamka," Muhammad Adel Haleem, Adel Omar Sherif, iyo Kate Daniels, Eds., I.B.Tauris (daabacista), 2018.
26. Garsooraha madaxabannaan ee aan dhexdhexaadka ahayni waa daalim, xukunkiisuna ka ma fulinayo laamaha kale ee dowladda. Garsooruhu ma noqon karo dhexdhexaad ilaa uu madaxbannaan yahay. Haddaba, inta badan madaxbannaanida iyo eex la'aantu way wada socdaan.
Garsooraha madaxabannaan ee aan dhexdhexaadka ahayni waa daalim, xukunkiisuna ka ma fulinayo laamaha kale ee dowladda. Garsooruhu ma noqon karo dhexdhexaad ilaa uu madaxbannaan yahay. Haddaba, inta badan madaxbannaanida iyo eex la'aantu way wada socdaan.

Sidaasi si la mid ah, aragtida kala saarista woodaha waxa loo tiiriyaa nin la odhan jiray French judge Montesquieu,[27] oo noolaa qarnigii 18-aad, kaasi oo si aad ah loogu xigto in uu yidhi: "Xorriyadi ma jirto haddii aan awoodda garsoorka laga saarin gacmaha awoodda sharci-dajinta iyo awoodda fulinta". Wax yar uun kadib, Dawladda Maraykanku waxa ay qaadatay Dastuurkeeda cusub, kaasi oo garsoorka ka soocaya hay'adaha siyaasadda, isla markaana abuuraya garsoor madaxbannaan oo ah laanta saddexaad ee dowladda.[28]

Waxyaabaha dejiyeyaashii Dastuurka Maraykanka ku dhiirrigaliyay in ay abuuraan garsoor madaxbaannaan waxa ugu weynaa ku tagrifalkii awoodeed ee ay ku kacday boqortooyadii Ingiriisku. Waxa ay garwaaqsadeen halisaha ka dhasha marka dhammaan awoodaha dowladnimo lagu wada ururiyo gacanta laanta fulinta oo keli ah; taasi oo dadka gayaysiisa dulmi iyo ciqaab aan loo meeldayin. Taariikhda Soomaaliya ee ku saabsan ku xadgudubka awoodda dowladda waxa ay si weyn ugu muuqaal egtahay waayo-aragnimadii hore ee Mareykanku kala kulmay tacaddigii xukunkii Ingiriiska. Waayo haddii awooddii fulinta ee maamulkii Siyaad Barre, ay la miisaan ahaan lahayd laamaha kale ee dowladda ee sharci-dajinta iyo garsoorka madaxbannaan, waxa ay u badan tahay in taariikhda Soomaaliya ay qaadi lahayd waddo aad uga geddisan tan ay haatan martay.

Waxa ay dajiyeyaashii Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya garwaaqsadeen muhiimadda ay leedahay in la dhiso saddexdan laamood oo simani, sida ka muuqata qoralkan: "Dastuurka Soomaaliya waxa uu dhiirrigelinayaa … kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbannaan" (Qodobka 3aad). Carrabka ku xoojinta ereyada "garsoor madaxbannaan" waa arrin muhiim ah. Dastuurku isaga oo si cad u tilmaamaya in garsoorku uu madaxbannaan yahay, ayuu laantan si cad gaar ugu soocay, ka madaxbaannaysiinintaas laamaha sharci-dajinta iyo fulinta keliya maaha xagga shaqada, balse waxa uu ka dhigay hay'ad goonni u taagan oo xor ka ah saamaayntooda. Mabaadi'da lagu qeexay Qodobka 3aad waxa ay u dhigmaan kuwa ay leeyihiin dalal badan oo dimuqraaddi ahi, kuwaas oo xuquuqda iyo xorriyadaha shakhsiyaadka lagu dhowro si cad u kala saarista awoodda. Intaas waxa dheer, in Cutubka 2aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ahi uu dammaanad qaadayo xuquuqda aasaasiga ah ee muwaaddinka, isaga oo xoojinaya in ay waajib tahay ilaalinta xorriyadaha qofeed.

Inkasta oo awoodaha laamaha dowladda si cad loo kala qeexay, haddana shaqooyinkoodu waa kuwo isku xidhan oo ay midiba midda kale ku tiirsan tahay si loo xaqiijiyo nidaam isku-dheellitiran oo wada shaqaynaya. Fulintu waxa ay dejisaa qorsheyaasha dowladda, iyada oo u gudbisa sharci-dejinta isla markaannahirgalisa shuruucda dalka; laanta sharci-dejintuna waxa ay soo saartaa shuruucda, waxa ayna qoondaysaa miisaaniyadda; halka laanta garsoorku ay difaacdo xuquuqda shakhsiga, iyada oo hubinaysa in sharuucdaas iyo siyaasaduhuba waafaqsan yihiin mabaadi'da dastuurka.

---

27. Montesquieu, Ruuxda Shuruucda, Qoraallada Cambridge ee Taxanaha Taariikhda Fikirka Siyaasadda, bogga 157.
28. Muhiimadda ay leedahay madaxbannaanida garsoorku, waxa mar kale hoosta ka xarriiqaya qeexitaanka qodobka 10aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka : ", Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo sinnaan buuxda iyo dhegaysi dadweyne, iyo kiiskiisa inay qaaddo maxkamad madaxbannaan oo dhexdhexaad ahi, si loo go'aamiyo xuquuqdiisa iyo waajibaadka saran, iyo dembi kasta oo lagu soo oogo. (wuu sii faahfaahinayaa).

Si gaar ah, laanta sharci-dejintu waxa ay kaalin aad u muhiim ah kaga jirtaa in ay laamaha fulinta iyo garsoorku si buuxda u gutaan masuuliyadahooda shaqo, iyada oo ku korjoogtayneysa qoondadooda miisaaniyadeed. Haddaba, intii ay shaqadooda iska hor imaan lahayd, hay'adahan waxaa loo qaabeeyay sidii ay isku kaashan lahaayeen markasta oo loo baahdo. Waxa ay isku-tiirsanaantani iftiiminaysaa muhiimadda iskaashiga iyo isu-dheellitirka hay'adaha, taasi oo ugu danbaynna xoojinaysa ku dhaqanka sharcigagacanna kagaysanaysa dhismaha maamul dimuqraaddi ah. Marka ay hay'ad weliba u shaqayso si waxtar leh oo waafaqsan kaalinteeda sharciga ahuna taageerto laamaha kale, waxa ay dowladdu karaan u yeelanaysa kobcinta bulshoxasilloon oo barwaaqo ah..

## 7.5 Garsoorka iyo Dastuurka Kumeelgaarka ah

Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya wax yar buu ka taabanayaa marka uu ka hadlayo qeexitaanka qaabdhismeedka maxkamadaha gaarka ah ee dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadaba. Waxa uu sheegayaa oo qur ah heerar maxkamadeed oo saddex ah[29], waxaanu jaangooynayaa awoodaha garsoor ee Maxkamadda Dastuuriga ah iyo xiriirka ay la leedahay maxakadaha federaalka. Waxaa xusid mudan, in Qodobka 109aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ahi uu tilmaamayo cidda leh masuuliyadda qeexidda xiriirka ka dhexeeya maxkamadaha federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada oo uu saarayodowladda federaalka, gaar ahaanna baarlamaanka federaalka.

Qodobka 109aad xarfihiisa B iyo C, ayaa si cad u tilmaamaya dhismaha iyo awoodaha Maxkamadda Dastuurka, iyaga oo u gaar yeelaya awoodda garsoor ee ka garniqista arrimaha dastuuriga ah. Dhanka kale, maxkamadaha federaalka ayaa awood u leh in ay ka go'aan gaaraan dhammaanba dacwadaha hoos yimaadda sharciyada federaalka, iyaga oo Maxkamadda Dastuuriga ahna u dhaafaya go'aanka kama dambaysta ah ee ku aaddan fasiradda arrimaha dastuurka. Inkasta oo ay awoodaha loo qoondeeyay garsoorku u muuqdaan kuwo macquul ahoo aan muran ku jiran, haddana waxa ay abuurayaan su'aal muhiim ah oo ah: horta ma jirtaa baahi loo qabo dhismaha maxkamad dastuuri ah oo gaar u taagan, mise shaqooyinkeeda waxa lagu dhex dari karaa awoodaha maxkamadaha federaalka?

Intaas waxaa dheer, in Dastuurka Kumeelgaarka ahi aanu soo jeedinayn in cid aan ka ahayn dowlad goboleedyada ay masuuliyaddeeda tahay dhismaha nidaamyadooda baxkamadeed ee uu gaarka ah, kuwaas oo ay ku jiraan maxkamadaha sare ee dowlad goboleedyadaasi. In Dowladda Federaalka loo ogolaado in ay farageliso oo dowlad goboleedyada u yeeriso sida ay nidaamayadooda garsoorku u shaqaynayaan ama loo qaabaynayo, waxa ay taasi meelkadhac ku tahay mabaadi'da faderaalaynta, waxa ayna horseedi kartaa caqabadoqaanuuneed iyo kuwo siyaasadeed oo waa weyn. Faragelinta noocan ah ee Dawladda federaalku waxa ay walaac iyo muran xooggan gelin kartaa madaxbannaanida maamul ee dowlad goboleedyada iyo awoodda ay u leeyiin in ay si wax ku ool ah isu maamulaan iyaga oo ku dhex shaqaynaya hannaanka federaalka ah.

---

29. Dastuurka Kumeelgaarka ah waxa uu taxayaa liiska Maxkamadda Dastuuriga ah; Maxkamadaha heer Federaal (oo ay ku jirto Maxkamadda Sare ee Federaalka); iyo Maxkamadaha heer Dowlad Goboleed.

## 7.6 Gaarsoorka Federaalka iyo Doorkiisa aan Dimuqraadiga ahayn: Dibu-eegista Garsoorka

Awoodda uu garsoorku ku dhex leeyahay nidaamka federaalka ee ah hubinta awoodaha laamaha sharci-dejinta iyo fulinta ayaa garsoorka siisay door aan lahayn dhaqan dimuqraadi ah, xataa haddii uu ku dhex jiro qaabdhismeed kale oo loo malaynayo dimuqraaddi. Halbeegga ugu muhiimsan ee lagu qiimayo dhaqanka dimuqraadiga ah ee hawlaha dowladduwaa in ay xukuumaddu ku timaaddo rabitaanka kuwa la maamulayo, taas oo inta badan ku saleeysan mabda'a qabashada doorasho qof iyo cod ah. Markaan oo kale, inta badan waxaa dimuqraaddiyadda looga cabbir qaataa qaacidada aqlabiyadda (majoritarian rule).

Si kastaba ha ahaatee, federaalku, sida uu caalamka uga hirgalay iyo sida ku xusan Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya intaba, waxa uu xiisad ka dhex abuurayaa mabaadi'da dimuqraadiyadda ee ku dhisan aqlabiyadda, laba sababood oo muhiim ah awgood. Tan kowaad, qaabdhismeedka Aqalka Sare ee Baarlamaankuwaa mid xaqiijinaya matalaad siman oo ay helaan dhamman dowladaha xubnaha ka ah dowladda Federaalka, iyada oo aan loo eegin tirada dadka ku nool.  Tan micnaheedu waa in maamul goboleedka ugu dadka yar iyo midka ugu dadka badani ay cod isleeg ku leeyihiin golahan. (Qodobka 72aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa uu mid kasta oo ka tirsan gobolladii jirey wixii ka horreeyay 1991 siinayaa midkiiba saddex kursi oo aqalka sare ah). Hannaankani waxa uu u taagan yahay ka hortagga kelitalisnimada aqlabiyadda, sababta oo ah aqalka sare waa dheellitirka dowlad goboleedyada waxa uuna taako ka yahay in aqalka golaha shacabka- oo kuraastiisa si hab dumuqraadi ah u janjeerta lagu yimaaddo-, uu ku xadgudbo[30] xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay. Dhab ahaantii, mid ka mid ah ujeeddooyinka ugu waa weyn ee cunsurradaan aan dimuqraadiga ahayn ee hannaanka federaalka la dhex geliyey laga leeyahay waa in lagu ilaaliyo danaha dadka laga tirada badan yahay.

Tan labaad, awoodaha maxkamadaha federaalku waxa ay arrinta ku kordhiyeen lakab kale oo ah korjoogtayn aan dimuqraaddi ahayn, taasi oo ah in ay awood u leeyihiin in ay laalaan/buriyaan sharciyada ay soo saaraan dowlad goboleedyadu ama xannibaan tallaabooyinka ay maamulladaasi qaadaan.[31] Inkasta oo uu Dastuurka Kumeelgaarka ahi maxakamadaha si cad u siinayo awoodda dibu-eegista shuruucda, haddana xaddiga awoodeed ee ay kula soconayaan tallaabooyinka laanta fulinta si cad oo buuxda looma qeexin. Waxaa xusid mudan, in garsoorku door weyn ka ciyaaro isu-dheellitirka awoodda, balse awoodda uu u leeyahay ka dulboodidda tallaabooyinka fulinta iyo sharci-dajinta waa kuwo xiisad ka dhex abuuri kara nidaamka dimuqraadiga ah.

---

30. Inkasta oo ay matalaadda Aqalka Hoose ee Soomaaliya hadda ku dhisan tahay nidaamka 4.5, haddana waxa ay u adeegtaa hab saammi-qaybsiga oo federal ah. Si kale haddii loo dhigo, nidaamka 4.5 waxa uu u shaqeeyaa sidii hannaan saammi-qaybsi.
31. Qodob ka mid ah dastuurka Soomaaliya ayaa oggolaanaya in ay laamaha fulinta iyo sharci dejintu dibu-eegis ku sameeyaan garsoorka, fadlan fiiri cutubka 9 ee Dastuurka KMG ah. Warbixintan ayaa si faahfaahsan uga hadlaysa qodobka quseeya, iyada oo la qiimaynayo sida ay hay'adaha garsoorka ugu suuragalinayso in ay hubiyaan laamaha kale ee dowladda, ilaaliyaanna dastuurka.

Isudheelitirkan isdiidooyinkan taxadarka mudan ee u dhexeeya difaacidda xuquuqda dadka laga tirada badan yahay iyo ilaalinta mabaadi'da dimuqraadiga ah ee aqlabiyadda ku saleysan waxa ay caqabad culus ku yihiin nidaamyada federaalka ah, sidaas darteed Soomaaliyana kuwaas kama duwana.[32]

## 1. Dibu-eegista Garsoorka ee ku Saabsan Go'aannada Sharci-dejinta

Sida ku cad Qodobka 109aad xarafkiisa C, Maxkamadda Dastuuriga ah waxaa awood loo siiyay in ay dhegaysato go'aanna ka gaarto dacwadaha- sida uu dhigayo Qodobka 87aad, ku saabsan caqabadaha la xidhiidha dastuurinimada sharcada ay baarlamanku ansixiyaan." Qodobka 86aad oo sii faahfaahinaya ayaa oranaya: "Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada …waxaa lagu duri karaa oo keli ah in uu ka soo horjeedo Dastuurka." Waxa uu qaabdhismeedkani garsooreyaasha, oo ah xubno aan la soo dooranin, siinayaa saamayn awood badan oo ay ku diidi karaan go'aannada laanta sharci-dejinta ee nidaamka federaalka Soomaaliya oo iyagu ah kuwo doorasho ku yimid.  Siinta garsoor aan la soo dooranin awood ay ku faragaliyaan tallaabooyinka wakiillada la soo doortay waxa ay su'aallo xasaasi ah ka keenaysaa habka isudheellitirka matalaadda dimuqraaddiga ah iyo doorka dibu-eegista ee garsoorka. Isdiidadani waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa sida ay u adag tahay samaynta dimuqraadiyad ku dhex shaqaynaysa nidaam federaalka ah, kaas oo ay awood-qaybsiga iyo ilaalinta xuquuqda shakhsiga ah iyo tan dadka laga tirada badan yahay u yihiin lafdhabar. Xaqiijinta isudheelitir qummani waxa uu lagama maarmaan u yahay hubinta in aan dimoqraadiyadda la badbaadin oo keli ah, balse ay horumar ku tallaabsato.

Qodobka kale ee xasaasiga ah oo asaguna mudan in si fiican la isudultaago ayaa ah isweydiinta ah cidda awoodda sharci u leh in ay duritaan ku samaayso sharci la meel mariyey, si waafaqsan Qodobka 86aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ah. Qodobkani waxa uu xusayaa 4 kooxood oo ishortaaggaas samayn kara oo kale ah:

(a) Dhammaan xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ama xubnaha golaha baarlamaanka ku matala mid ka mid ah Dowlad Goboleedyada;

(b) Saddex-meelood hal-meel oo ah xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka;

(c) Golaha Wasiirrada ee Dowladda Federaalka Soomaaliya; ama

(d) Toban kun (10,000) ama ka badan oo ah codbixiyeyaal diiwaangashan.

Habkan dowladda doo qur ah ku urursani waxa uu wiiqayaa ku dhaqanka sharciga isaga oo aad u xaddidaya kooxaha xaqa u leh ishortaagga sharciyada la meelmariyo. Sida caadiga ah, mabda'a sarreeynta sharcigu waxa uu u taagan yahay in qofkasta oo uu si taban u saameeyo sharci uu xaq u leeyahay in uu ka horyimaado. Haddaba, xaddidda uu qodobkan 86aad ku sameeyay cidda xaqaas leh oo uu ku koobay afar kooxood oo keli ah waxa ay mijaxaabineysaa mabda'aas.

32. Inkasta oo ay macquul tahay in Maxkamadda Dastuuriga ah la siiyo awoodda ugu sarreysa ee dastuuriyeynta sharciga, taas oo iyada ka dhigaysa maxkamadda darajada koowaad, arrimaha noocan oo kale ahina way uga sii darayaan. Haddaba, waa in laga fiirsado in baarlamaanka loo oggolaado in maxkamadda hoose laga dhigo maxkamadda darajada koowaad ee qaadda dacwadaha noocaan ah.

Bal ka fekir xaaladda uu ku sugan yahay qof xadhigiisa loo adeegsaday xeer gaar ah, oo aanay doodi uga furrayn wixii lagu soo xidhay. Sida ku xusan Qodobka 86aad, qofka noocaas ahi ma haysto awood sharci oo uu ku doodo kuna diido dastuurinimada sharciga loo adeegsadey, xataa isaga oo ay xorriyaddiisu halis ku jirto. Sidaas si la mid ah, haddii uu baarlamaanku meelmariyo xeer aan dastuurka waafaqsanayn, oo nolosha qof gaar ah halis gelinaya, Qodobka 86-aad waxa ka dhalanaysa su'aal xasaasi ah, oo odhanaysa: Waa maxay sababta qofkan loogu diiday in uu iska difaaco dhaqangelinta sharcigan sida tooska ah dhibku uga soo gaarayo?

Ugu yaraan, dadka uu xeer gaar ahi si toos ah u saameeyay, sida kuwa lagu eedeeyay faldembiyeedyo ama ka cabanaya hanti laga lunsaday, waxa ay ahayd in ay helaan xuquuqda ay ku duri karaan dastuurinimada sharcigaas. Haddii aan la helin qodobbada sharci ee noocaas ah, hannaanka dibu-eegista garsoorku waxa uu ahaan doonaa mid aan waxtar badan lahayn, kuna guuldarraysta in uu ka hortago ku xadgudubyada sharciga ee ay ku kacaan sharci-dejintu. In dadka ay sida tooska ah xeerarkaasi u saameeyeen loo ogolaado in ay raadsadaan cawilcelin garsoor waxa ay lafdhabar u tahay in garsoorku dhowrayo mabaadi'da cadaaladda iyo islaxisaabtanka oo loo marayo nidaamka sharciga.

## 2. Dibu-eegista Garsoorka ee ku Saabsan Tallaabooyinka Fulinta

Inkasta oo uu Dastuurka Kumeelgaarka ahi maxkamadaha si cad u siinayo awoodda garsoorku u leeyahay dibu-eegista sharciyada, —isaga oo u ogolaanaya in uu laalo sharciyada loo arko in ay dastuurka khilaafsan yihiin, haddana awoodda uu garsoorku u leeyahay in uu korgoogtayn- ku sameeyo habdhaqanka laanta fulinta waa mid xaddidan marka dhinacyo badan laga eego mararka qaarna duuduub ah.

Qodobka keliya ee maxkamadaha siinaya awood ay ku qiimeeyaan tallaabooyinka fulinta, waa Qodobka 109(2) (d), kaas oo dhigaya: "qof ama koox kasta ama dowladduba waxa ay dacwadahooda si toos ah ugu gudbin karaan Maxkamadda Dastuuriga ah marka ay timaaddo arrimaha ku saabsan danta guud." Inkasta oo ay farqaddani u ogoshahay shakhsiyaadka iyo kooxaha, kuwaas oo ay ku jirto bulshada rayidka ahi in ay tallaabooyinka fulinta ku dawcayn karaan maxkamadda, haddana in dibu-eegista garsoorka lagu koobo xaalado gaar ah marka ay timaaddo tallaabooyinka fulinta, oo la adeegsado qaacidadan madmadowgu ku jiro ee odhanaysa "arrimaha khuseeya danta guud" waxa ay meelkadhac ku tahay mabaadi'da ku dhaqanka sharciga.

Marka dhan laga eego, u ogolaanshaha dadweynaha in ay ishortaagaan tallaabooyinka fulinta, iyada oo lagu salaaynayo halbeeggan waxa ay burineeysa awoodda gaarka ah ee fulintu u leedahay dejinta siyaasadaha guud, gaar ahaanna meelaha aaney ka jirin sharciyo khaas ahi. Marka la eego nidaamka federaalka ah, qaabka ugu saxan xaddidaadda awoodaha fulinta waa in ay maxkamaduhu awood u yeeshaan laalidda tallaabooyinka xadgudubka ku ah shuruucda jirta ama qodobbada dastuuriga ah. Haddii aanu jirin sharci mamnuucaya tallaabo gaar ah, tallaabadaasina aaney xadgudub ku ahayn Dastuurka, fulintu iyadaa door u leh hirgalinta siyaasadaha dowladeed oo noocan ah illaa inta ay sharci-dajintu wax ka qabanayso arrintaas.

Ogolaanshaha in is hortaagga tallaabooyinka fulinta lagu saleeyo danta guud oo keliya waxa ay dhaawacaysaa awoodaha fulinta. Haddii ay sharci-dajintu doonayso in ay xaddiddo tallaabooyinka fulintawaa in ay ku wajahdaa sharci cad.

Taas lidkeeda, maqnaanshaha qodobbo si ballaaran oo dhammaystiran maxakadaha ugu ogolaanaya in ay dibueegis garsoor ku sameeyaan tallaabooyinka fulinta waxa ay abuureeysaa duruuf laanta fulinta u suurtagelisa in ay ku kacdo falal sharci-darro ah iyadaoo aan la kulmin wax islaxisaabtan ah, gaar ahaanna arrimaha danta guud ee aan markaa kicinayn walaaca dadweynaha. xannibaadani waxa ay shakhsiyaadka ka dhigeysaa kuwo aanhaysan fursadda ka dacwoodka marka ay dowladdu ku kacdo falal khaldan, balse markaa ka baxsan soohdinta waxa si gaabis ah loogu arko ‘arrimaha danta guud’. In qaabkan loo xaddido dibu-eegista garsoorka waxa ay laanta fulinta u ogolaanaysaa in ay dabarrada goosato oo u shaqayso si ka baxsan xayndaabka sharciga, siiba xaaladaha markaa u muuqda in aaney taabanayn arrimaha ‘danta guud, taas oo mijaxaabineeysa islaxisaabtanka isla markaana ka dhigeeysa tallaabooyinka halista leh ee xukuumaddu qaaddo kuwo aan la xakamaynin.

Waxa intaas dheer, in Maxakamadda Dastuuriga ah laga dalbado in ay dhegaysato dhammaan kiisaska danta guud- iyada oo laga soo qaaday in ay tahay maxkamadda darajada koowaad- waxa ay gebi ahaanba khatar gelineysaa maxkamadda waxa ayna ka weecineysaa shaqadii waajibaadkeeda dastuuriga ah. Hannaanka ugu waxtarka badan waxa uu noqon karaa in maxkamadaha derejada kowaad loo ogolaado in ay marka hore galaan kiisaska dibu-eegista garsoorka la xiriira, iyada oo markaa kadib fursad loo siinayo u rafcaan qaadashada maxkamadaha derajada sare. Tallaabadani waxa ay Maxakamadda Dastuuriga ah u suurtagalineysaa in ay awoodda shaqadeeda iskugu geeyso arrimaha dastuuriga ah ee culus, iyada oo gudageleeysa dhegaysiga iyo ka go’aan gaarista dacwadaha kadib marka ay soo maraan habraaca nidaamka rafcaan qaadashada oo keli ah. Habraacan daalka badani waxa uu ka hortagayaa in Maxkamadda dusha laga saaro culaysyo xad dhaaf ah, si loo hubiyo in ay si qumman uga baaraandegto dacwadaha arrimaha dastuuriga ah ee ugu muhiimsan ee ay gacanta ku hayso.

## 8. Madaxbannaanida Garsoorka

Madaxbannaanida garsoorka waxa lagu fahmi karaa iyada oo laga eegayo labo dhinac oo aad u muhiim ah: madaxbannaanida shakhsiga ah iyo madaxbannaanida hay’adda guud ahaan. Madaxbannaanida shakhsiga ahi waxa ay qeexdaa xorriyadda iyo madaxbannaanida garsoore kasta, iyada oo la hubinayo in ay garsooreyaashu go’aannada u gaadhaan si xor ah, iyaga oo ka madaxbannaan faragalin iyo cadaadis cid kale, taasi oo garsooreyaasha u ogolaanaysa in ay soo saaraan xukun caddaaladeed oo dhexdhexaad ah. Dhanka kale, madaxbannaanida guud ee hay’adda waxa ay xoogga saartaa garsoorka in uu noqdo hay’adda goonni ah, iyada oo la hubinayo in garsoorku si guud uu hawlihiisa u guto isaga oo ka madaxbannaan faragelin kasta oo kaga timaadda dhanka laamaha kale ee dowladda amaba xoogag dibadeed.

Haddaba, sida ay muhiim u tahay madaxbannaanida garsoorku ayeey lama huraan u tahay in taas lagu dheelitiro islaxisaabtan. Sharci-yaqaan badani waxa ay ka digayaan in madaxbannaanida iyo islaxisaabtanka garsoorka loo gacangaliyo laamaha siyaasadda, iyaga oo ka cabsi qaba in ay korjoogtaynta noocaas ahi horseedi karto ku xadgudub awoodeed, isla markaana ay xagaldaacin karto madaxbannaanida garsoorka. Iyada oo iskeed isu maamulidda hay'addan ay ku tiirsantahay dhaqan adag oo aamminsan madaxbannaanida garsoorka- sida ka jirta nidaamyada garsoor ee Maraykanka iyo Ingiriiska, kaasi oo ah mid aan hadda ka jirin Soomaaliya- haddana astaamaha qaabdhismeedka siyaasadeed waa in uu noqdaa mid lagu xaqiijinayo madaxbannaanida iyo islaxisaabtanka garsoorkaba. Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa uu dhigayaa isudheellitir tixgelin mudan, isaga oo soo jeediyey in madaxbannaanida iyo islaxisaabtanka garsoorkaba la gaaro, iyada oo loo marayo dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka (GAG), kaas oo loogu talagalay in uu ilaaliyo anshaxa garsoorka, isaga oo aan marnaba gorgortan gelinayn madaxbannaanidiisa.

Dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka oo ah hay'ad madaxbannaan ayaa muujiyey waxtarka weyn ee uu ku leeyahay kor u qaadista madaxbannaanida garsoorka, gaar ahaanna marka la eego dalalka soo koraya. Tusaale ahaan, Koonfur Afrika waxa ay dhistay Guddideeda Adeegga Garsoorka sannadkii 1994, iyada oo awood buuxda u siinaysa in ay xushaan, isla markaana magacaabaan dadka gaarsoorka u soo tartamaya.

Si kor loogu qaado waxqabadka Guddigan, Koonfur Afrika waxa ay shir isugu yeedhay oo magaalada Cape Town ku cusuntay sharci-yaqaanno caalami ah, si ay u daraaseeyaan habraacyada magacaabista iyo anshax-marinta garsooreyaasha ee dalal kala duwan.[33] Waxaana iskaashigaasi ka soo baxay 'Baaqa Cape Town ee Mabaadi'da Guddiyada Madaxbannaan'.r[34] Mabaadi'daas oo u qareemaya guddiyo ka madaxbannaan xukuumadaha oo yeesha dhaqaale ku habboon iyo qaabdhismeed haggaagsan.

Mabaadi'da Cape Town ayaa iftiiminaysa muhiimadda ay leedahay in kala duwanaanshe ka jiro guddiyada dhexdooda, iyada oo la hubinayo ka qaybgelinta xubno shacabka caadiga ah ka mid ah, si looga hortago saameynta siyaasadeed ee aan habboonayn. Waxa intaas dheer, in ay guddigu uu dadka tartamaya ku kala xusho halbeegyo cad-cad oo degsan oo ku salaysan caddeeymaha tartamayaashu soo gubiyaan iyo ilo-baariseedyo kale oo xog-ogaal ah. Sidaas oo kale, waa in ay jirtaa xoghayn iyo shaqaale diyaarsan oo gacan ka gaysta kala reebista tartamayaasha, qabanqaabinta waraysi-afeedyada iyo ururinta iyo keydinta xogaha tartamayaasha. Sababtoo ah hannaan xirfadaysan oo xulasho iyo kala reebis ahi waxa uu xoojiyaa daah-furnaanta nidaamka iyo kalsoonida dadweynaha. Sidaas si la mid ah, waraysi-afeedyada tartamayaasha ee lagu qaado fagaareyaasha furan waxa ay sii xoojin karaan kalsoonida shacabku ku qabaan garsoorka.

33. Dalka Koonfur Afrika ayaa isu keenay aqoonyahanno ka kala socda Koonfur Afrika, Kenya, Canada, Malaysia, Nigeria, iyo UK, si ay u baaraan hannaanka hannaanka ay dalalkaasi u soo magacaabaan garsoorayaasha. Mashruuca waxa gacan ka gaysatay Xarunta Sharciga ee Birmingham ee Machadka Ingiriiska ee Caalamiga ah iyo Isbarbardhigga Sharciga. Shirka ayaa lagu soo gabagabeeyey mabaadiida Cape Town ee xulashada guddiyada madaxabannaan iyo magacaabista garsoorayaasha dalalka Barwaaqo-sooranka ee Britain.
34. https://constitutionnet.org/sites/default/files/cape_town_principles_-_february_2016.pdf

Sidaas oo kale, guddidu waa in ay dejisaa hannaan doodeedyo cadcad, iyaga oo qeexaya goobaha kulamada, shuruudaha kooramka iyo hababka codaynta. Waraysi-afeedyada iyo doodaha ka dib, jago kasta oo garsoorka ka bannaan waa in loo doortaa halka tartame ee ugu mudan. Kaas oo markaa kadib ay soo magacaabayaan madaxda awoodda u leh. Haddaba, guddi ay dhexdiisa ka jirto kala duwanaan isla markaana madaxbannaan waxa uu mudanyahay in uu kasbado taageero uu shacabku ku siiyo habkaan magacaabista garsoorayaasha.

## 8.1 Madaxbannaanida Qofka Garsooraha ah

Marka laga eego dhanka qofka garsooraha ah, nuxurka madaxbannaanida garsoorku waxa ay ku saabsantahay in uu garsooruhu gaaro go'aanno caddaalad ah, isaga oo aan wax cabsi ah ka qabin aargoosi dhanka xukuumadda ah ama cadaadisyo uga yimaada dhinacyada dacwadda u dhexeeyso. Sidaas si la mid ah, garsooraha madaxabannaani waa in uu karti u leeyahay in uu shaqadiisa u guto si hufan oo ka madaxbannaan faragelinta laanta fulinta ama tabashooyin dhaqaale oo wax u dhimaaya madaxbannaanidiisa iyo caddaaladdiisa.

Si loo dhawro madaxbannaanida garsooraha, waxaa muhiim ah in shuruudaha magacaabista garsooraha, muddo-xileedkiisa iyo xuquuqdiisa maaliyadeedba si cad oo dhammaystiran loo qeexo. Garsoorayaasha waa in mushahar ku filan la siiyo isla markaana amnigooda la ilaasho si aan waxyeello uga iman dhanka dhinacyada dacwadda, eedaysaneyaasha iyo saraakiisha dowladdaba.

Xagga xilhaynta, garsoorayaashu waxa ay shaqaayn karaan ilaa laga gaaro da'da hawlgabka loo qorsheeyay, sannado cayiman amaba inta ay noolyihiin, taasina waxa ay ku xidhantahay hadba hannaanka sharci ee jira. Intaas waxa dheer, in ay aad u muhiim tahay in uu jiro qiyam garsoor oo xooggan, si loo hubiyo in aan duruufaha dhaqaaluhu gilgilin ama saameeyn tabban ku yeelan garsoorayaasha oo ay leeyihiin karti ay ku dhawraan caddaaladda iyo hufnaantooda garsoorenimo.

## 8.2 Madaxbannaanida Nidaamka Garsoorka

Si aad uga geddisan fashilka siyaasadeed ee foolaadka siyaasadda Soomaaliya, dejiyayaashii Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa ay madaxbannaanida garsoorka ka dhigeen tiirdhexaadka nidaamka federaalka. Waxa ayna ku tilmaameen madaxbannaanida garsoorku in ay tahay mid ka mida "Mabaadi'da Aasaaska u ah" Dastuurka. Qodobka 3aad ayaa si cad u dhiirrigalinaya mabda'a "kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoorka madaxbannaan." Erayga madaxbannaani" waxa uu caalamka oo dhammi u fahamsan yahay in uu tilmaamayo garsoor ka madaxbannaan faragelin, isaga bannaanka ka ah, gaar ahaanna laamaha siyaasadda. Isaga oo arrintan sii xoojinaya, Qodobka 106aad waxa uu caddaynayaa "garsoorku waxa uu ka madaxbannaan yahay laamaha Dowladda ee Sharci-dejinta iyo Fulinta marka ay gudanayaan xilkooda." Dastuurku waxa uu intaas sii raacinayaa in uu "qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh (Qodobka 34aad).

Si loo xaqiijiyo madaxbannaanida garsoorka, waxa uu Qodobka 106-aad sheegayaa "xubnaha garsoorku waxa ay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga." Waxa uuna difaacayaa garsooreyaasha isaga oo oranaya "garsooraha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa garsoorennimo."

### 1. Golaha Adeegga Garsoorka

Madaxbannaanida garsoorka waxaa si weyn u saameeya halisaha deegaan ee soo foodsaara garsooreyaasha iyo qoysaskoodaba, cidda leh awoodaha magacabista, anshaxmarinta, mushahar siinta iyo jaangooynta duruufohooda shaqo intaba. Qodobka 109A ee Dastuurka Kumeelgaarka ahi waxa uu Golaha Adeegga Garsoorka awood u siinayaa in ay "Magacaabaan, anshaxmariyaan isla markaana beddelaan xubnaha garsoorka ee Federaalka;" in ay "go'aamiyaan mushaharka iyo lacagta hawlgabka ee garsoorayaashaa;" in ay "Dejiyaan shuruudaha shaqo ee garsoorka." Golaha Adeegga Garsoorku waa hay'adda u xilsaaran ilaalinta madaxbannaanida iyo islaxisaabtanka garsoorka federaalka ee Soomaaliya.

Marka laga yimaaddo awoodaha lagu sheegay qodobka 109aad faqradiisa A, Qodobka 106aad waxa uu sii adkaynayaa difaaca garsoorayaasha isaga oo shardi ka dhigaya in la helo oggolaansha haddii la rabo in la baaro guryohooda ama iyaga shakhsi ahaan. Sidaas oo kale, Qodobka 111aad faqradiisa A waxa ay odhanaysaa Golaha Adeegga Garsoorku "waa in uu madaxbannaanaadaa, dhexdhexaad noqdaa, oo aanu hal dhinac u xaglin" si uu u xaqiijiyo madaxbannaanida garsoorka. Haddaba, Madaxbannaanida golaha ayaa lafdhabar u ah in uu ilaaliyo garsoorka loogu talagalay in uu difaaco. Sida ku cad Qodobka 109aad faqradiisa A, Golaha Adeegga Garsoorku waxa uu ka koobanyahay sagaal xubnood oo kala ah: Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, laba garyaqaan oo sare oo ka tirsan Garyaqaanadda Soomaaliyeed, Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka; iyo Saddex qof oo ka socda bulshada rayidka ah. Kala duwanaanshahan xubnaha Guddigu waa in ay keentaa sii xoojinta difaaca garsoorka. Si kastaba ha ahaatee, shardiga ah in uu Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurku ka mid noqdo xubnahan ayaa muujinaya in aan Golaha Adeegga Garsoorka la dhisi karin ilaa laga helo Maxakamadda Dastuuriga ah, taasi oo dib u sii dhigeysa horumarka garsoorka.

Waxa xusid mudan, in uu Golaha Adeegga Garsoorka Soomaaliya macaga la wadaago Golaha Adeegga Garsoorka Koonfur Afrika oo 1994 loo aasaasay ujeeddo tan la mid ah. Isu ekaanshahan ayaa muujinaya saamaynta ay khuburada sharciga caalamiga ahi ku lahayd diyaarintii Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, taas oo ka tarjumaysa in la qaatay astaamaha dastuur ee ka hirgalay waddamo badan oo soo koraya. In ay Soomaaliya qaadato hannaankan degsan ee Koonfur Afrika (kor ka eeg faahfaahinta qaabka Koonfur Afrika) waxa ay kaga baaqsatay in ay waqti iyo tacabba ku sii lumiso yagleelidda hab cusub oo ku saabsan madaxbannaanida garsoorka. Haseyeeshee, foolaadka siyaasadda oo ku fashilmay dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka ayaa garsoorka iyo dalkaba geliyay xaalad cakiran, taasi oo curyaamisay in uu garsoorku helo madaxbannaani dhab ah.

## 2. Maxkamadda Dastuurka

Qodobka 109aad faqradiisa B ee Dastuurka kumeelgaarka ah ayaa faraysa dhismaha Maxakamadda Dastuurka, taas oo uu dhigan: "Maxakamaddu waxa ay ka kooban tahay shan garsoore oo ay ku jiraan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo kuxigeenkiisu.' Garsoorayaashan ayaana iska dhex dooranaya Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka. Maxkamadda dastuurku waxa ay awood buuxda u leedahay in ay fasirto dastuurka iyo sida oo kale in ay laasho sharciyada aan dastuurka waafaqsanayn. Iyada oo ku dhawaaqaysa in uu xeerkaasi yahay waxba kama jiraan iyo xilliga go'aankaasi dhaqangal noqonayo: laga soo bilaabo markuu soo baxay, ama marka xukunka lagu dhawaaqay, ama ay soo saarto tallaabada ku habboon sharci-darranimada looga saaro amaba xilli mustaqbalka ah oo ay maxkamaddu joongooyso (Qodobka 109C). Sidaas si la mid ah, Maxakamadda Dastoorku waxa ay door mihiim ah ka qaadataa go'aaminta sharcinimada xil ka xayuubinta madaxweynaha ka hor inta aaney labada gole ee baarlamaanku wax codeyn ah samaaynin. Sidaa darteed, Maxakamadda Dastooriga ah waxa loogu talagalay in ay saameyn weyn ku yeelato sida awoodaha kala duwan loo adeegsanayo marka laga hadlayo Dowladda Federaalka. Maqnaanshaha Maxakamadda Dastuuriga ahi waxa uu meesha ka saaray shaqadii mihiimka ahayd ee dibu-eegista iyo korjoogtaynta ee garsoorka. Waxa ayna taasi abuurtay marnaansho sharci oo halis badan kaas oo ay inta badan buuxiyaan madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dawlad goboleedyada oo qaata go'aanno iyo tallaabooyin laab la kac ah oo aan sharci ku fadhin.

Sida ku cad Qodobka 109 aad faqradiisa B ee Dastuurka Kumeelgaarka ah, waxa uu Golaha Adeegga Garsoorka awood u siinayaa in ay soo jeediyaan garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka, markaa ka dibna waxaa ansixinaya Baarlamaanka ka hor inta aanu Madaxweynuhu si rasmi ah u magacaabin garsoorayaashaas. Sida uu dhigayo Qodobka 90aad ee Dastuurku, Madaxweynuhu waxa uu awood u leeyahay in uu magacaabo guddoomiyaha Maxakamadda.[35] Si kastaba ha ahaatee, dhismaha Maxakamadda Dastuurku waxa uu ku xiranyahay jiritaanka Guddiga/Golaha Adeegga Garsoorka, kaas oo asaguna ku sii xiran ka mid ahaanshaha Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah oo xubin ka ah.

Isdiidadani waxa ay abuurtay iska dabawareeg: Sababta oo ah Golaha Adeegga Gorsoorka lama dhisi karo iyada oo aaney jirin Maxkamaddii Dastuurku, Maxkamadda Dastuurkana lama samaayn karo iyada oo aan la helin Golihii Adeegga Garsoorka. In kasta oo ay jiraan iskudayo dhowr ah, haddana Baarlamaanka Fedaraalku waa uu ku guuldareystay in uu labadan hay'adood midkoodna ku soo dhiso mudada sharciga ah ee uu u cayimay qodobka 35aad ee Dastuurku, taas oo Soomaaliya ku riddey waddo oodan sida keliya ee looga bixi karanaa tahay wadaxaajood iyo xal siyaasadeed, oo arrintan u jid bixiya.

35. Qodobka 90-aad ee sheegaya in awoodda magacaabista guddoomiyaha maxakamadda dastuuriga ah uu leeyahay madaxweynuhu, isaga oo kala tashanaya Guddida Adeegga Garsoorka (JSC), waxa uu ka hor imanayaa qodobka 109B, oo sheegaya in shanta garsoore ee maxkamadda dastuuriga ahi dooranayaan Guddoomiyaha Sare ee Maxkamadda. Khilaafkan waa la sixi karaa haddii Guddida Adeegga Garsoorku natiijada garsoorayaasha Maxakamadda Sare u adeegsadaan talo soo jeedin uu madaxweynuhu ku magacaabayo Guddoomiyaha Sare ee Maxakamadda Dastuurka.Sida uu qodobka 90-aad u adeegsaday kelmadda "Guddoomiye" iyo meelaha kale ee lagu isticmaalay Garsooraha Sare, waxa ay muujinayaan in uu jiro degdeg iyo qabyo-qoraal.

In ka badan toban sano oo ka soo wareegtey aasaaska dowladdii u horreeysey oo federaal ah, weli laguma guuleeysan in la yagleelo Golaha Adeegga Garsoorka iyo Maxakamadda Dastuurka midkoodna, waxa ayna taasi keentay in uu garsoorku si toos ah u hoos joogo laanta fulinta, arrintaas oo si cad u burineeysa Dastuurka Kumeelgaarka ah.

## 9. Xaaladda Garsoorka ee Xilligan iyo Isbedellada la soo Jeediyey

Qaab-dhismeedka maxkamadaha hadda jira ee shanta dowlad gooboleed ee Soomaaliya (marka Somaliland laga reebo) waa mid qadiim ah oo ka kooban: maxkamadaha derajada koowaad (maxkamadaha dacwaddu ka bilaabmato),[36] Maxakamadda Rafcaanka iyo Maxkamadda Sare, dowlad goboleed kastaana waxa uu leeyahay nidaamkiisa garsoor ee u gaarka ah. In kasta oo maxakamadaha derajada koowaad iyo midda rafcaankuba ka howlgalaan gobolka Banaadir, haddana Muqdisho ma laha maxkamad sare oo u goonni ah. Marka la eego heer federaal, Muqdisho waxaa ku taalla Maxakamad Sare ee Dalka, haseyeeshee, ma jiraan maxkamado heer fedaraal ah oo ka hawlgala dowlad goboleedada ama Muqdisho toonna.[37]

Sida caadada u ah nidaam federaal ah, dowladaha xubnaha ka ah dowladda fedaraalku waa in ay lahaadaan nidaamyadooda maxkamadeed oo iyaga u gaarka ah, isla markaana uu ka barbar shaqeeyaa nidaamkii garsoorka ee heer fedaraal oo ku baahsan waddanka oo dhan. Isaga oo heer kastaba ka kooban yahay: maxkamadaha derajada koowaad, Maxkamadda Rafcaanka iyo Maxkamadda Sare. Inkasta oo qaar ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay sameeysteen maxkamado u gaar ah, haddana inta badan tayada maxkamadahaasi waa mid xaddidan karti badanna aan u lahayn in ay daboolaan baahiyaha bulshada. Waxaa intaas dheer, in aaney ka jirin dowlad goboleedyada iyo gobolka Baraadirba maxkamado derajada koowaad iyo rafcaanka ah oo heer federaal ah. Haddii Soomaaliya ay raacdo qaab-dhismeedka maxkamadaha federaalka ee caadiga ah oo oggolaanaya nidaam maxkamadeed heer gobol iyo heer federaal oo iska barbar shaqeynaya, waxaa loo baahan doonaa dibuqaabayn ballaaran oo lagu sameeyo nidaamka garsoorka Soomaaliya, iyada oo la la waafajinayo hannaanka federaalaynta; taasi oo u baahaneysa ballaarin mug leh si maxkamado looga hirgeliyo loona gaadhsiiyo magaalo iyo tuulo walba.

---

36. Maxkamada darajada koowaad, maxkamada degmada, iyo bilowga dhagaysiga dacwadaha waa erayo isku wada mid ah oo la isku bedbeddelan karo. Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxa aay lahaan jirtay maxkamado heer degmo ah iyo kuwo heer gobol ah oo ah maxkamadaha darajada koowaad. Caadi ahaan, awoodda labadan maxkamadood ee darajada koowaad waxa ay ku salaysan tahay mawduuca kiiska (dambiyada waaweyn ama xaddiga lacageed ee muranka madaniga ah), iyada oo ay maxkamadda degmadu dhageysato dambiyada iyo khilaafyada yaryar. Puntland ayaa isku dartay Maxkamadaha darajada koowaad ee heer degmo iyo heer gobol, waxaana ay gacanta ku haysaa hal nooc oo ah maxkamadda darajada koowaad, waxaanay leedahay hal maxkamad oo darajada koowaad ah, taas oo dhagaysata dhammaan dacwadaha maxkamadaha darajada koowaad. Dowlad goboleedyada kale ayaa u muuqda in ay raacaan nidaamka maxkamadaha darajada koowaad ee heer degmo iyo heer gobol.

37. Maxkamada darajada koowaad, maxkamada degmada, iyo bilowga dhagaysiga dacwadaha waa erayo isku wada mid ah oo la isku bedbeddelan karo. Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxa aay lahaan jirtay maxkamado heer degmo ah iyo kuwo heer gobol ah oo ah maxkamadaha darajada koowaad. Caadi ahaan, awoodda labadan maxkamadood ee darajada koowaad waxa ay ku salaysan tahay mawduuca kiiska (dambiyada waaweyn ama xaddiga lacageed ee muranka madaniga ah), iyada oo ay maxkamadda degmadu dhageysato dambiyada iyo khilaafyada yaryar. Puntland ayaa isku dartay Maxkamadaha darajada koowaad ee heer degmo iyo heer gobol, waxaana ay gacanta ku haysaa hal nooc oo ah maxkamadda darajada koowaad, waxaanay leedahay hal maxkamad oo darajada koowaad ah, taas oo dhagaysata dhammaan dacwadaha maxkamadaha darajada koowaad. Dowlad goboleedyada kale ayaa u muuqda in ay raacaan nidaamka maxkamadaha darajada koowaad ee heer degmo iyo heer gobol.

Xaddidnaanta dhaqaalaha iyo cududda shaqaalaha xirfadlayaasha ah ee Soomaaliya ka jirta ayaa hirgelinta arrintan ka dhigeeysa mid aad u adag, haddiiba aaney ahayn hawl aan macquul noqon karin.

Mid ka mid ah xalalka lagu xusey heshiis siyaasadeedkii Jowhar ee 2018[38] iyo wax ka bedelladii lagu sameeyey ayaa ahaa in nidaamka maxkamadaha la isku dhafo. Halkii laga samayn lahaa maxkamadaha derajada koowaad ee heer dowlad goboleed iyo heer fedearaal oo iska barbar shaqeeya, heshiiskani waxa uu soo jeedinayaa hannaan maxkamadeed oo mideeysan oo ay wadaagaan labada heer ee dowladdu. Intaa waxa dheer, in mxakamadaha sare ee dowlad goboleedyada la siiyo awood ay kaga garnaqaan kiisaska rafcaanka ee heer federaal, iyada oo maxkamadaha sare iyo kuwa derajada koowaad ee dowlad goboleedyadana loo oggolaanayo in ay adeegsadaan awoodaha garsoorka fedaraalka. Hannaankan waxaa looga golleeyahay in la fududeeyo nidaamka garsoorka, kharashaadkiisa la dhimo, si fiicanna looga faa'iideysto hibada garsoorayaasha, isla markaana lagu xoojiyo waxqabadka nidaamka garsoorka Soomaaliya. Garsoorayaasha nidaamkani waxa ay qaban doonaan galal la xidhiidha labada heer, si la mid ah nidaamyada qadiimka ah ee fedaraalka ah, kuwaas oo caddeymaha iswaafaqsan loo adeegsado labada heerba, si loogu go'aan gaaro. Haseyeeshee, habkaan iskudhafani waxa uu khilaafsan yahay nidaamyo dhaqameedkii hore ee maxkamadaha, isaga oo awoodda ka garsooridda ee asalka/bilowga ah ee ku saabsan dacwadaha heer dawlad goboleed iyo heer federaalba siinaya maxkamadaha derajada koowaad ee dowlad goboleedyada. Halka uu awoodda garsoor ee Maxkamadda Rafcaanka Federaalka uu siinayo maxkamadaha sare ee dowlad goboleedyada. Habkaan mideysan waxa uu maxkamadaha u suurtagelinayaa in ay si siman xal uga gaaraan arrimo sharci oo ballaaran.

Xalka kale ee suurtagal ah waa in la sameeyo maxkamado wareega, kuwaas oo ay garsoorayaashu isaga gooshayaan magaalooyin iyo tuulooyin kala duwan si ay u soo dhegeeystaan dacwadaha. Maxkamadahani waxa ay yeelan karaan awoodda ka garniqista galalka dacwadaha derajada koowaad iyo kuwa rafcaankaba, waxa uuna arrinkani si wanaagsan wax uga tari karaa caqabadaha haysta bulshooyinka ku filiqsan deegaanada ka durugsan magaalooyinka waa weyn. Marka loo eego nidaamkan, hal garsoore ayaa qaadi kara dacwadaha derajada koowaad iyo kuwa rafcaanka labadaba, marka laga reebo halkan shardi ee dhigaya: garsooraha dhegeystay dacwadda derajada koowaad kama qaybgeli karo dhegeysiga isla dacwaddaas ee heerka rafcaanka.

Isku darka habka maxkamadaha wareega iyo nidaamka maxkamadaha iskudhafani waxa ay xal u noqon karaan caqabadaha dhanka dhaqaalaha iyo shaqaalaha xirfadda leh, ah ka haysata Soomaaliya, taas oo abuureysa garsoor si wax ku ool ah uga jawaaba baahiyaha dadweynaha.[39]

---

38. Somaliland iyo Puntland oo ka maqnaa miiska heshiiska ayaa su'aal gelinaya sida ay ugu qanci doonaan heshiis muhiim ah oo ay ka maqan yihiin. Intaa waxaa dheer, in heshiiskan dowladda federaalku maamulka si buuxda ugu la wareegtay garsoorka dowlad goboleedyada, sababta oo ah maadaama uu heshiisku isku-dhafayo maxkamadaha heer gobol iyo kuwa heer federaal, kuma xidhnayn Guddida Adeegga Garsoorka, taasina waxa ay Guddida Adeegga Garsoorka federaalka ka dhigaysaa mid si buuxda u maamusha nidaamka maxkamadaha isku-dhafan. Tani waxa ay u badnayd korjoogtayn.

39. Dabcan, waxkabeddelka hannaanka maxakamadaha waxa ay caqabad ku tahay nabadgelyada dalka. Si kastaba ha ahaatee, ilaha amniga ee muhiimka u ah waxkabeddelka garsoorayaasha iyo kaaliyayaashooda waxa ay wiiqayaan isbarbardhigga dhisidda iyo maamulka nidaamyo maxkamadeed oo badan.

Haddii marka hore nidaamka iskudhafka ah laga bilaabo tiro kooban oo maxkamadaha degmooyinka ee dowlad goboleed kasta ku yaal, laguna sii dhammaystiro habka maxkamadaha wareega si ay u galaan kiisaska rafcaanka waxay keenaysa in kheyraadka loo isticmaalo sida ugu fiican. Garsoonayaasha maxakamadda derajada koowaad iyo maxakamadda sare sidaas oo kale waxa ay ka qeybqaadan karaan kisaska rafcaanka haddii aaney aheyn garsoorayaashii horay u soo xukumey isla galkaas. Habkaan iskudhafka ahi waxa uu kor u qaadi karaa helida caddaaladda, iyada oo isla markaana sida ugu wanaagsan looga faa'iideysanayo kheyraadka xaddidan ee la haysto.

Hirgalinta qaabdhismeedkan maxkamadeed ee sidaas isugu dhafani waxa uuu baahan yahay hoggaan adag iyo garyaqaanno karti leh. Isku dhex laridda nidaamka maxkamadaha wareega iyo maxkamaddaha iskudhafka ahi waxa ay hoos u dhigaysaa tirada garsoorayaasha iyo xarumaha ee loo baahan yahay, iyada oo isla markaana kor loogu qaadayo helitaanka caddaaladda ee muwaaddiniinta Soomaaliya. Habkani waxa uu abuurayaa nidaam garsoor oo dhaqaale ahaan la awoodi karo, kana jawaabaya baahiya dhamaan shacabka, kaas oo daboolaya baahiyaha bulshooyinka ku filiqsan meelaha durugsan, isaga oo sidaas oo kale xoojinaya kalsoonida lagu qabo hannaanka garsoorka dhidibbadana u aasaya ku dhaqanka sharciga.

Inta badan daneeyayaasha garsoorka Soomaaliya waxa ay qirsanyihiin sida ay u adag tahay in dalka laga hirgaliyo nidaam maxkamadeed oo iskudhafan. Mid ka mid ah isweydiimaha walaaca leh ee soo noqnoqda ayaa ah: miyaa lagu dari doonaa hannaankan iskudhafkaah qeybaha kale ee caddaaladda —sida xeer-ilaaliyayaasha, booliska, hay'adaha baadhista iyo xabsiyada. Haddiiba hay'adahaan lagu daro nidaamka iskudhafka ah, su'aallo kale ayaa ka dhalan doona oo la xiriira sidee loo maamili doonaa. Ma waxaa la sameyn doonaa maamul guud oo raacsan dowladda dhexe oo kor korjoogteeya, taas oo iyadana halis ku noqon karta madaxbannaanida nidaamyada caddaaladeed ee dowlad goboleedyada.

Sidaas oo kale waxa halkaa ka sii dhalanaya su'aallo ku saabsan iskudheelitirka awoodda hannaanka federaalka. Daneeyayaashu waxa ay aad uga walaacsan yihiin suurtagalnimada ku xadgudub awoodeed oo dhanka dowladda fedaraalka ka yimaadda, taasi oo ah arrin inta badan ka dhacda nidaamyada federaalka ah. Haddii dowladda fedaraalku ay gacanta ku dhigto dhammaan hay'aha caddaaladda, waxa ay khatar galin kartaa mabaa'di'dii fedaraalaynta, kuwaas oo loo qaabeeyey in awoodaha lagu qeybsado, maamullada maxalliga ahna, fursad loo siiyo si ay uga jawaabaan baahiyahooda heer gobol. Haddaba, nidaamka caddaaladda oo lagu ururiyo gacanta dowladda dhexe waxa uu halis ku noqon karaa madaxbannaanida dowlad goboleedyada waxa uuna wiiqayaa awooddii ay ku maamuli lahaayeen caddaaladda si waafaqsan qiyamka iyo duruufaha deegaannadooda.

Intaa waxa dheer, in iskudhafka hay'adaha cadaaladdu uu hoos u dhigi karo isla xisaabtanka. Marka nidaamka fedaraalka laga hadlayo, badanaa maamullada maxalliga ah ayaa dowladda dhexe uga fara dhuudhuuban in ay ka jawaabaan caqabadaha u gaarka ah maamuladooda, maadaama ay iyagu faham qota-dheer u leeyihiin bulshada ay maamulayaan. Sidaas darteed, hannaan garsoor oo dowladda dhexe gacanta ku wada hayso waxaa ka dhalan kara in baahiyaha laga jawaabi kari waayo ayna noqdaan maamulka garsoorka iyo baahiyaha bulshadu kuwo kala fog.

Sidaa darteed, doodaha la xidhiidha iskudhafka nidaamka garsoorka iyo maxakamadaha waa in lagu ladho doodo waa weyn oo ku saabsan hannaanada maamulka, islaxisaabtanka, iyo doorka fedaraalayntu ku leedahay kor u qaadista caddaaladda. Daneeyayaashu waxa ay ku baaqayaan in la sameeyo wadatashi, si loo caddeeyo waxa uu iskudhafka nidaamka garsoorku dhab ahaan yahay, xooggana lagu saaro baahida loo qabo xalal ka jawaabaya arrimaha la xidiidha is dhexgalinta nidaamka garsoorka, sida dhammeystirka cutubyada awood qeybsiga ee Dastuurka, taas oo loo marayo hab wada-oggol ah dowlad goboleedyadu u dhanyihiin.

Waxaa jira baaq xoogan oo lagu doonayo in si daahfurnaan ah looga hadlo sida uu iskdhafkani dhab ahaan u shaqeyn doono, iyada oo isla markaana la damaanad qaadayo la sameeynayo ku aaddan in aan lagu xadgudbin mabaadi'da maamulka maxaliga ah iyo isla xisaabtankaba. Inkasta oo isku dhafka maxkamadduhu uu yeelan karo faa'iidooyin, sida in kiisasku si fudud oo wadajir ah u dhammaadaan, haddana in la hubiyo in aan isku dhafku si taban u saameyn madaxbannaanida iyo duruufaha u gaarka ah nidaamyada garsoor ee dowlad goboleedyada waa mid muhiim ah. Isudheelitirkani waxa uu mihiim u yahay in la hubiyo in iskudhafka garsoorku uu u adeegayo baahiyaha dhammaan bulshada, isla markaana uu ilaalinayo mabaa'dida aasaasiga ah ee fedaraalaynta.

## 10. Maxkamadaha Iskudhafan iyo Dastuurka kumeelgaadhka ah

Nidaamka sharci ee Soomaaliya maaha mid weli si buuxda loo horumariyey si uu ula jaanqaado hannaanka fedaraalka ee dhowaan la qaatay, sababta ugu badan ee arrintanna waa in aanu jirin rabitaan siyaasadeed iyo sidoo kale in aan loo hayn dhaqaale iyo shaqaale xirfad leh oo ay ka mid yihiin farsamo-yaqaanno iyo xeel-dheerayaal dhanka sharciga ah. Inkasta oo nidaamka hadda jiraa uu la halgamayo in uu si buuxda u daboolo baahiyaha cadaaladeed ee bulshada, hayeeshee nidaamka maxkamadaha iskudhafan ee la soo jeediyey ayaa daaha ka feydaya waddo yididdiilo leh oo Soomaaliya u suurtagalin karta in ay dhisto garsoor oo si habboon ugu dhex shaqaynaya hannaankeeda fedaraalka ah ee cusub. Haddii waajibaadka iyo ka go'naanshaha siyaasadeed ee lama huraanka u ah si loo hirgeliyo habkan iskudhafan wuxuu aasaas adag u noqon karaa bulsho ku dhisan ku dhaqanka sharciga iyo xuquuqda aadanaha. Iyada oo la xoojinayo qaddarinta ku dhaqanka sharciga, nidaamkan maxkamadha iskudhafan waxa uu qayb muhiim ah ka qaadan kara sii adkaynta nabad waarta waxa uuna sahli karaa in ay Soomaaliya si buuxda ugu tallaabsato dhanka dimuqraadiyadda.


Waxaa xusid mudan, in Dastuurka Kumeelgaarka ahi aanu wax badan ka sheegin arrimaha khuseeya maxkamadaha dawlad goboleedyada, isaga oo sheegaya oo keliya: "Maxakamadda ugu sareeysa ee dowladaha xubnaha ka ah fedaraalku waa in ay ahaataa maxkamadda sare ee dowlad goboleedkaas". Balse wax faahfaahin ahna lagama bixin doorka ay ku yeelaneyso kiisaska heer fedaraal. Luuqaddan ayaa abuureysa filasho ah in ay jirayaan nidaamyo maxakamadeed oo kala madaxbannaan oo ah heer gobol iyo heer fedaraal. Waxaa intaa sii dheer, in aan dastuurku caddeynin cidda ka masuulka ah in ay maxkamadaha dowlad goboleedyada soo dhisto.

Inkasta oo uu madmadogaas badani ku jiro, haddana weli waxaa socda dadaallo lagu dhisayo maxkamado iskudhafan, kaas oo maxkamad keli ahi ay qabaneyso kiisaska derajada koowaad ee heer fedaraal iyo heer dowlad goboleedba, halka maxkamadda sare ee dowlad goboleedkuna ay awood u leedahay dhegeeysiga dacwadaha Maxkamadda Rafcaanka ee heer fedaraalku gashay. Marka la eego habkan, garsoorayaasha maxkamadda derajada koowaad kuwa maxkamadda sare ee dowlad goboleedyada ayaa goáan ka gaadhaya arrimaha sharci ee heer fedaraal iyo heer gobolba. Fikir ahaan, nidaamkan maamulkiisu kama adka in la kala saaro maxkamadaha dowlad goboleedyada iyo kuwa fedaraalka.

Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya waxa uu hiigsanayaa in la aasaaso garsoor madaxbannaan, sida ku cad qodobbada, 3aad, 105aad, 106aad, iyo 108aad, haseyeeshee waxa uu qaab dhismeedka garsoorka u dhaafay sagaalka xubnood ee Guddigga Adeegga Garsoorka ee aan weli la sameeyn sida ay sheegayaan qodobbada 109aad faqradiisa B iyo 111aad faqradiisa A. Soo jeedinta qaabdhismeedka maxkamadaha iskudhafan waxa ay ka soo jeeddaa heshiiskii Jowhar ee 2018 kaas oo saadaaliyey nidaam ay maxkamadaha gobolada iyo kuwa fedaraalkuba wadaagaan dhismayaasha iyo garsoorayaasha derajada koowaad ee maxkamadda. Marka la eego qorshahan, dowlad goboleed kastaa waxa uu yeelanayaa maxkamad rafcaan oo u gaar ah, maxkamad sare oo leh awoodda rafcaanka fedaraalka iyo farac ka tirsan maxkamadda dastuurka, taas oo gaadhi karta go'aanada ugu danbeeya ee arrimaha dastuurka, marka laga reebo kiisaska xaquuqal iinsaanka ee dowladda fedaraalku ku lug leedahay. Dowladda fedaraalku waxa ay yeelaneysaa maxkamad sare iyo maxkamadda dastuuri ah oo u goonni ah, kuna yaalla muqdisho; haseyeeshee, maxkamadaha sare ee dowlad goboleedyada ayaa qabanaya shaqada maxkamadda rafcaanka ee heer fedaraal.

Jaantuskan waxa lagu soo koobey qaab-dhismeedka maxakamadaha la filayo in uu hirgalo ee ku xusan heshiiska Jowhar.

**Heshiis Siyaasadeedkii Jowhar ee Maxakamadaha ee 2018**



Si la mid ah sida ku xusan Dastuurka Ku-meelgaarka ah heshiiskani waxa uu aasaasayaa sagaal xubnood oo ah Guddiga Adeegga Garsoorka. Si kastaba ha ahaatee, maadaama fikradda iskudhafka maxkamadaha dowlad goboleedyada iyo kuwa dowladda federaalku aaney markii hore jirin, Guddiga Adeegga Garsoorku waxa ay ku kooban yihiin masuuliyiin heer fedaraal ah. Sidaas darteed, a Guddiga Adeegga Garsoorku waa hay'ad heer federaalka ah oo ku dhex shaqayneysa nidaamka maxkamadaha iskudhafan.

In la oggolaado in Gudida Adeega Garsoorka ee fedaraalku uu korjoogteeyo maxkamadaha iskudhafan, waxa ay halis galin kartaa madaxbannaanida nidaamka garsoorka dowlad goboleedyada ee ku xusan Dastuurka Kumeelgaarka ah. Sidaas oo kale, jiritaanka laamo badan oo Maxakamadda Dastuurka ah, mid walibana ay awood u leedahay in ay gaadho go'aannada u danbeeya, waxa ay sababi kartaa in ay soo baxaan xukunno kala duwan oo isburinaya iyo jaahwareer sharci; taas oo ugu danbeynta mijaxaabin karta ku dhaqanka sharciga. Sidaa darteed, qaab-dhismeedka Golaha Adeegga Garsoorka iyo maqnaanshyaha habka u rafcaan qaadashada ikhtiyaariga ah ee Maxkamadda Dastuurka ee khuseeysa go'aannada ay gaaraan maxkamadaha dowlad goboleedyadu labaduba waxa ay dhalinayaan walaac weyn oo laga qabo heshiiska Jowhar.


Qolaha wasiirada ayaa mar danbe waxkabeddel ku sameeyey heshiishkii Jowhar, kana saaray faracyadii ay Maxakamadda Dastuurku ku yeelan lahayd dowlad goboleedyada. Haseyeeshee, . inkasta oo uu waxkabeddelkani macquul yahay oo uu meesha ka saarayo suurtagalnimadii iswaafaq la'aanta xukunnada maxkamadda dastuurka, haddana qaabdhismeedka Guddiga Adeegga Garsoorku waxa uu weli su'aal galinayaa hufnaanta hannaanka garsoorka iyo isudheelitirnaanta awoodaha fedaraalka iyo kuwa dowlad goboleedyada.

Golaha Wadatashiga Qaranka ayaa sidoo kale wax ka qabtay arrinta qaabdhismeedka Golaha Adeegga Garsoorka iyaga oo soo jeediyey dhismaha guddi iskudhafan oo ka kooban xubno ka kala socda oo matalaya dowlad goboleedyada iyo fedaraalkaba. Heshiiskii ugu danbeeyey ee Golaha Wadatashiga Qaranku waxa uu sidiisa u deynayaanidaamka maxkamadaha iskudhafan, waxa uuna meesha ka saaraya laamaha Maxakamadda Dastuurka ee dowlad goboleedyada, isaga oo isla markaana abuuraya Guddiga Adeegga Garsoorka oo ka kooban 24 xubnood oo ka kala socdadowladda fedaraalka, dowlad goboleedyada iyo magaalada Muqdisho. Dibuhabeyntani waxa ay kor u qaadeysaa matalaadda Golaha Adeegga Garsoorka waxa ayna la jaanqaadeysa mabaadi'da Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee looga gollahaa dhowrista madaxbannaanida garsoorka dhammaan heerarkiisa kala duwan.

Waxaa xusid mudan, in Golaha Adeegga Garsoorka Soomaaliya ee la qaateymarkii hore loogu talogaley nidaamka maxkamadaha fedaraalka oo ku saleysan hal hannaan-sharciyeed—sharciga fedaraalka. Iskudhafka maxkamadaha derajada koowaad waxaa ka dhalanaya caqabo aad u waa weyn oo la xidhiidha hannaanka fedaraalaynta. In Golaha Adeegga Garsoorku korjoogteeyo nidaamka maxkamadaha iskudhafka ah ee heer federaal iyo dowlad goboleedba waxa ay u baahan tahay wada shaqeyn aad u xooggan oo u dhaxeeysa dowlad goboleedyada iyo dowladda fedaraalka, taasi oo ka qota-dheerheshiishka iskudhafka maxkamadaha.

Garsoorayaashu waxa ay leeyihiin awood sare, taas oo magacaabistooda ka dhigeeysa qodob mihiim ah oo ay hoggaamiyaasha dowlad goboleedyada iyo kuwa fedaraalkuba ku saameeyn karaan. Inta lagu guda jiro habsocodka xulashada garsoorayaasha waxaa caqabad baaxad leh noqon doonta in la iskudheelitiro danaha dowladda fedaraalka iyo kuwa dowlad goboleedyada, isla markaana la xusho xirfadleyaal sharci oo aqoon durugsan u leh arrimaha aadka u culus ee khuseeya herdanka dowladda fedaraalka iyo dowlad goboleedyada. Haddaba, culeyskani waxa uu uu hoosta ka xarriiqayaa baahida loo qabo in hab ka baaraandeg iyo iskaashi/wada-shaqeyn ku dhisan loo maro howshan, si loo hubiyo in garsoorku si waxtar leh ugu dhex shaqaynayo hannaanka maxkamadaha iskudhafan.

Jaantuskani waxa uu muujinayaa qaab-dhismeedka maxkamadaha ee uu soo jeediyey Golaha Wadatashiga Qaranku oo ay ku jiraan awoodaha iyo tallaabooyinka habraac. Xarriiqaha madoowi waxa ay muujinayaan tallaabooyinka rafcaanka, halka xarriiqaha dhibcaha iyo labada geesood lihina ay u taagan yihiin qeybinta awoodaha ee gudaha nidaamka.




Inta badan awoodaha iyo habraacyada nidaamkan cusub ee maxkamadaha ee la soo jeediyey waa kuwo macquul ah; si kastaba ha ahaatee in Maxakamadda Sare ee Fedaraalka iyo Maxakamadda Dastuurka la siiyo awoodda qaadista dacwadaha bilowga ahi waxa ay keeni kartaa caqabado waa wey.

Kiisaska noocaas ah oo inta badan ku saleysan caddeymo ururin iyo in faahfaahin tiro badan la raadiyo, waxa ay ku habboon yihiin maxkamadda derajada koowaad, taas oo loogu talogaley in ay la tacaasho caqabadaha bilowga ah ee dacwad oogista.

Sida oo kale, haddii maxkamadaha sare ay masuul ka noqdaan ka garniqidda murannada ka dhex dhasha hay'adaha dowladda fedaraalka ama go'aannada ka soo baxa wasaaradaha waxaa iman karta in kiisaku tan dhaaf ku noqdaan culeysna ku keenaan awooddii ay ka ga jawaabi lahaayeen arrimo waa weyn oo qaranka mihiim u ah. Hadabasi taas looga hortago, awoodda ka garsooridda arrimaha la xidhiidha go'aannada hay'adaha iyo khilaafaadka ka dhex dhasha hay'adaha dowladda waa in lagu aaminaa maxkamadahaderajada koowaad. Taasi waxa ay u oggolaaneysaa Mxakamadda Sare iyo Mxakamadda Dastuurka in ay diiradda saaraan arrimo intaa ka culus oo qaranka mihiimadda weyn ugu fadhiya, halkii lagu daalin lahaa khilaafaad arrimo maamul ama muranno hay'adaha dowladda u dhexeeya.

Qaab-dhismeedka maxkamadaha ee uu soo jeediyey Golaha Wadatashiga Qaranku waxa uu soo bandhigayaa aasaas- adag oo dib loogu yagleelayo garsoorka Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan in aan Puntland iyo Somaliland toonna ka qaybgalin wadaxaajoodkii heshiishka lagu gaadhey Jowhar 2018 kii ee ay ka dhalatay asalka aragtida iskudhafka maxkamadaha, sidaas oo kale kama aaney qaybgalin wadahadalladii Golaha Wadatashiga Qaranka ee lagu saxayey gadaloolooyinkii heshiiskaas iyo waxkabeddelkii ay ku sameeyeen golaha wasiiradu midkoodna.

In kasta oo aan cid Muqdisho metaleysaa ka qaybgalin heshiiskii hore ee Jowhar, haddana Duqa magaalada Muqdisho ayaa ka qeybgalay wadahadalladii Golaha wadatashiga qaranka. Si uu midhadhal u noqdo nidaamka maxkamadaha iskudhafani, waxaa mihiim ah in la isugu imaaddo wadaxaajood balaadhan oo ay u dhan yihiindhammaan dowlad goboleedyada, magaalada Muqdisho iyo dowladda federaalku. Haddii aan taageero iyo heshiish wada-oggol ah laga helin dhammaan dhinacyada daneeyeyaasha ah waa adagtahay in uu nidaamkaani si waxtar leh u shaqeeyo. Dhismaha hannnaan wada-oggol ahi waxa uu lama huraan u yahay hufnaanta iyo waxqabadka garsoorka eemustaqbalka..

Shaxda 1aad: Qaab-dhismeedka Golaha Adeegga Garsoorka ee Dastuurka Kumeelgaarka ah iyo heshiiskii Jowhar 2018 iyo faracyadiisa

## Shaxda 1aad: Qaab-dhismeedka Golaha Adeegga Garsoorka ee Dastuurka Kumeelgaarka ah iyo heshiiskii Jowhar 2018 iyo faracyadiisa

| Source / Xubnaha Guddiga Adeegga Garsoorka | Dastuurka Kumeelgaadhka Ah** (9 Xubnood) | 2018 Heshiiskii Jowhar (9 Xubnood) | 2021 Golaha Wasiirrada (9 Xubnood) | 2022 Golaha Wadatashigan Qaranka (24 Xubnood) |
|---|---|---|---|---|
| Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Fedaraalka | ✓ | ✓Gudoomiye | ✓ | ✓ Gudoomiye |
| Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Xeer-ilaaliyaha Guud ee Fedaraalka | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dowlad goboleedyada | ✗ | ✗ | ✗ | ✓ |
| Xeer-ilaaliyeyaasha Guud ee Dowlad goboleedyada | ✗ | ✗ | ✗ | ✓ |
| Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Muqdisho | ✗ | ✗ | ✗ | ✓ |
| Xeer-ilaaliyaha Guud ee Muqdisho | ✗ | ✗ | ✗ | ✓ |
| Xubnaha Guddiga Xaquuqal Iinsaanka | ✓ Gudoomiyaha Gudida Xaquuqal Iinsaanka | ✓ | ✓ | ✓ Xubnaha Gudida Xaquuqal Iinsaanka Oo Uu Xusho Wasiirka Cadaaladu, Golaha Wasiirradu Ansixiyeen |
| Qareeno Khibrad Leh Oo Ka Tirsan Xeer-ilaalinta | ✓ 2 Xubnood | ✓ | ✓ | ✓ 3 Xubnood |
| Saddex Khabiir Sharci | ✗ | ✗ | ✗ | ✓ |
| Saddex Qof Oo Sumcad Ku Dhex Leh Bulshada Soomaalida | ✓ | ✓ | ✓ | ✗ |

✓ Haa ✗ Maya

** Sida ku cad Dastuurka Kumeelgaarka ah, Guddiga Adeegga Garsoorku iyaga ayaa dooranaya Gudoomiyaha.

# Heshiiskii Jowhar waxaa meesha laga saarey in gudoomiyaha Maxakamadda Sare ee Fedaraalku uu ahaado gudoomiyaha Guddida Adeegga Garsoorka, haseyeeshee waxba lagama beddelin xubinnimada guddiga ee uu Dastuurka Kumeelgaarka ahi ogol yahay. Sidoo kale waxkabeddelkii golaha wasiiradu ay 2021 ku sameeyeen heshiiska Jowhar, waxba lagagama beddelin xubinnimada guddiga ee uu jideeyey Dastuurka Kumeelgaarka ahi.

Halxiraalaha ugu adag ee u baahan xal iyo falsami siyaasadeed waa tan ku saabsan isku-xidhnaanta aasaaska Maxkamadda Dastuurka iyo Guddiga Adeegga Garsoorka, kuwaas oo sida uu Dastuurka Kumeelgaadhka ahi sheegeyo midba midka kale ku xidhan yahay aasaaskiisu. Sida uu dhigayo Dastuurku, Golaha Adeegga Garsoorka waxaa masuuliyadeheeda ka mid in ay soo jeediyaan isla markaana qiimeeyaan garsoorayaasha Mxakamadda Dastuurka, halka Mxakamadda dastuurku dooraneyso Guddoomiyeheeda —kaas oo sidoo kalexubin ka ah isla Guddida Adeegga Garsoorka. Isku tiirsanaantoodaas waxa ay abuureysaa xaalad cakirnaan ah oo aan midna midka kale la'aantiis dhismi karin. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la helo xal siyaasadeed si looga baxo derbigan oodan, taas oo suurtagal ka dhigeysa in si qumman loo aasaaaso labada hay'adoodbalana hubiyo in uu garsoorku u shaqeeyo sidii loogu talogalay.

## 11. Dhismaha Nidaam Maxakamadeed oo Iskudhafan

Xataa xaddii laamaha siyaasaddu ku guuleystaan in ay sameeyaan dastuur si qota-dheer uga hadlaya habraacyada sharci ee aasaaska maxkamadaha iskudhafan, haddana dhismaha dhabta ah ee maxkamadahaas[40] oo ay dhinac socoto tababarrada sharci ee aasaasiga ah si dib u habeyn loogu sameeyo nidaamka garsoorka, loona xoojiyo dhaqanka ku dhaqanka sharciga iyo ixtiraamka xaquuqda aadamaha, waxa ay qaadan doontaa sannado si yoolashaa loo gaaro. Haddaba, iskudhafka maxkamadaha fedaraalka iyo kuwa dowlad goboleedyada oo lagukabayo nidaamka maxkamadaha wareegawaa nidaamka garsoor ee ugu habboon ee ay Soomaaliya qaadan karto. Haseyeeshee, howshani waa mid mug weyn oo u baahan doonta taageero siyaasadeed oo  muhiim ah, khibradda sharci-yaqaanka iyo maalgelin dhaqaale.

Dabcan, Soomaaliya ma aha dalkii ugu horreeyey ee caqabad kala kulma dib u dhiska hay'adaha dastuuriga ah kana soo bilaabey meel maran. Qaramada Midoobey ayaa soo saartey hageyaal tiro badan oo loogu talogalay xaaladaha la midka ah caqabadahan garsoorka Soomaaliya haysta. Daraasaddani waxa ay toosha ku ifineeysaa xeelado la diiwaan galiyey oo loogu talogalay dibusoo-dhiska nidaamyada garsoorka ee aan shaqeyneynin, waxa ayna diiradda saaraysaa in ujeeddada ugu weyn ee dadaalka dibudhis kasta ay tahay in uu dhidibbo adag ku taago mabda'a ku dhaqanka sharciga.

40. Marka laga hadlayo abuuritaanka nidaam maxkamadeed oo isku-dhafan oo ka jira dowlad goboleedyada, waxa muhiim ah in la qiro in aanay dowlad-goboleedyadu ku jirin xaalado isku mid ah. Inkasta oo ay Puntland (iyo Somaliland) dhisteen hay'ado leh awood garsoor, dowlad goboleedyada kale weli may gaarin heerkan. Sidaa awgeed, abuuritaanka maxkamaduhu waxa ay lagama maarmaan u noqonayaan dowlad-goboleedyada intooda badan, halka ay Puntland (iyo Somaliland) u baahan doonaan taageero gaar ah oo la jaanqaadaysa, kuna habboon nidaamyadooda horumarsan. Xaqiiqatan, Puntland, waxa ay noqon kartaa tusaale ku dayasho mudan oo dalka oo dhammi ka qaadan karo nidaamka maxakamadaha. Iyada oo la raacayo qaab-dhismeedka garsoor ee Puntland ka jira, waa in ay doorkeeda hoggaamineed ka qaadan karto dibudhiska nidaamyada maxkamadeed ee guud ahaan dalka laga hirgalinayo. Habkani waxa uu suuragalinayaa in hay'adaha Puntland ka dhisani noqdaan bar bilow laga dhaqaaqo, oo gacan ka gaysta sidii loo hagi lahaa horumarinta garsoorka dowlad goboleedyada aanu hadda wanaagsanayn itaalkoodu, iyada oo la la wadaagayo habdhaqannada ugu wanaagsan iyo casharradii laga bartay waayo-aragnimada garsoorka Puntland.

Si loo bilaabo geeddisocodka dibudhiska waaxda garsoorka, waxaa mihiim ah in qiimeeyn lagu sameeyo nidaamka hadda jira. Taas oo loo marayo in la uruuriyo xogaha gobolka Banaadir iyo dowlad goboleedyada, wareysiyo laga qaado shaqaalaha garsoorka ee mihiimka ah, la kormeero maxkamadaha iyo dacwadaha ka socda, lana booqdo hay'adaha kale ee xidhiidhka la leh arrimaha caddaaladda. Cilmibaadhista uu sameeyey Machadka Daraasaadka Siyaasaadka ee Heritage intii u dhaxeeysay 2020 ilaa 2021 ayaa aasaas muhiim ah u ah sahankan lagama maarmaanka ah.

## 11.1 Qiimeynta Xaaladda Garsoorka

Tallaabada ugu horreeysa ee qorshaynta dibudhiska waaxda garsoorka Soomaaliya, waa in si qota-dheer loo fahmo howlaha hadda socda, lana qiimeeyo goldaloolooyinka iyo gaabiska ku jira nidaamka garsoorka. Qaar ka mid ah caddaalad darrooyinka nidaamka ka dhex jira waxa ay si xeel fog u la xidhiidhaan xaalado taariikheed, taas oo lagama maarmaan ka dhigeysa in Soomaalida aqoonta u lihi ay iska kaashadaan isla markaana qiimeeyaan xaaladda laanta garsoorka ee dowlad goboleed kasta.

Sahmintani waxa lagu baadhi doonaa shaqada hay'adaha mihiimka u ah caddaaladda, sidabooliiska, xeer-ilaaliyeyaasha, maxkamadaha iyo xabsiyada—iyada oo la raadinayo caddeeymo la xidhiidha goldaloolooyinkooda iyo meelaha gaabisku kaga jiro. Waxaa mihiim ah in la sameeyo qiimeyn dhameystiran si loo fahmo dhinacyada toolmoon ee laanta garsoorka iyo meelaha uu ku liito intaba, si loo hubiyo in dadaallada dibuhabeyntu ku saleysan yihiin fahanka dhabta ah ee dhaqamada iyo caqabadaha jira. Maadaama la rajeynayo in la dhiso Maxakamada Dastuurka iyo Golaha Adeegga Garsoorkaoo isagu magacabeya garsoorayaasha, waa in sidaas oo kale ay qiimeynta diiradda saartaa qodobada saameeya magacaabistooda iyo fadhiidnimo kasta oo ka jirta maamulka maxkamadaha. Intaas waxa dheer, sahanno kooban oo laga sameeyo magaalooyinka waa weyn si loo qiimeeyo arigtada bulshadu ka qabaan sumcadda nidaamka garsoorka ayaa iyaguna aragtiyo qiimo leh daraasadda ku biirin doona.

Arrimaha mihiimka ah ee ay tahay in kooxda qiimeynta sameynaysaa ay baadhaan:

- **Shaqada garsoorka:** in qiimeyn lagu sameeyo shaqada garsoorka iyo aagaga uu fadhiidka ka yahay, lana aqoonsado shaqaalaha la isku haleyn karo ee gacan ka geeysan kara dibuhabeynta.

- **Hab-dhaqanka booliiska:** in baadhis lagu sameeyo heerka xad gudubyada booliisku ay u geystaan xoriyadda shakhsiga ah iyo xaquuqda aadamaha, lana qiimeeyo sida ay garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyeyaashu wax uga qaban karaan xadgudubyadaas.

- **Xaaladaha xabsiyada:** in dib u eegis lagu sameeyo xaaladaha xabsiyada, sida buux-dhaafka xabsiga, nadaafad xumada, tacadiyada ku-takrifalka awoodaha, mudada qofka xabsiga lagu hayo eed iyo maxkamadayn la'aan iyo sida uu garsoorku u xallin karo dhibaatooyinkan.

- **Kormeerka bulshada rayidka:** Helitaanka ururro ka socda bulshada rayidka ah oo kormeer ku sameeya hay'adaha caddaaladda, si loogu kuurgalo sidii loo taageeri lahaa, kor u qaadista daahfurnaanta iyo islaxisaabtanka.

- **Musuqmaasuqa iyo dembiyada abaabulan:** in la baadho baahsanaanta musuqa iyo dembiyada abaabulan, si gaar ah ka ganacsiga tahriibka dadka, ka ganacsiga daroogada iyo ka ganacsiga waxyaabaha kale ee mamnuuca ah.

Qiimeyntu/sahmintan waxaa laga filayaa in ay sheegto tallaabooyinka muhiimka ah ee dibuhabeynta, iyo in hay'adaha ay khuseeyso ay siiso falanqayn dhammeystiran oo ku saabsan waaxda garsoorka, iyada oo la iftiiminayo arrimaha la xiriira halbeegyada maxkamadaynta caddaaladdda ku dhisan ee waafaqsan heerarka caalamiga ah ee la aqoonsan yahay. Taas waxaa sii dheer, kooxda qiimeynta waddaa waxa ay qaban karaan aqoon-iswaydaarsiyo loo qabto garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyasha iyo booliiska, kuwaas oo ku saabsan sharciyada arrimahan la xidhiidha, xaquuqda maxkamadayn caddaalad ah iyo ku dhaqanka sharciga. Isu keenista matalayaashan ka kala socda hay'adahaan muhiimka ahi waxa ay xoojineeysaa isfahamka dhammaan dhinacyada iyo in uu midba midka kale kaalinta uu kaga jiro maamulka caddaaladda u aqoonsado, taas oo dhiirigelinaysa iskaashiga dhinacyadan si loo helo nidaam garsoor oo waxqabad iyo caddaalad ku dhisan.

## 11.2 Dibuhabeynta Hay'adaha Mihiimka u ah Bahda Caddaaladda

Si dibuhabeyn loogu sameeyo hay'adaha caddaaladda Soomaaliya, wakiillo ka socda dowlad goboleedyada, Muqdisho iyo dowladda fedaraalkuba waa in ay ugu horreeyn u helaan xal siyaasadeed lagu saxayo fashilka nidaamka hadda jira. Ugu horreeyn waa in mudnaanta la siiyo in garsoorka laga madaxbannaaneysiiyo laanta fulinta, loona aqoonsado laan madaxbannaan oo dowladda ka tirsan. Tallaabooyinka kale oo siyaasadeed ee ay mihiimka tahay in la qaado waxaa ka mid ah in la isku waafaqo qaab-dhismeedka maxkamadaha, aasaaska Guddiga Adeegga Garsoorka, dhismaha Maxkamadda Dastuurka iyo waxkabeddelidda Dastuurka markii ay lagama maarmaan noqoto. Waxkabeddelladaasi waa in ay xal u helaan arrimaha lagu muransan yahay oo ay ku jiraan awood-qaybsiga, doorka Guddiga Adeegga Garsoorka iyo qaab-dhismeedka maxkamadaha. Marka qaab-dhismeedka maxkamadda si fiican loo qeexo oo saldhig adag oo dastuuri ah loo sameeyo, kadib dadaallada dibuhabaynta garsoorku waa in ay bilaamaan iyada oo ay taas garab socoto xal u helidda arrimaha qaabdhismeedka dowladda ee walaacu ka jiro.

Inkasta oo hay'ado badani ka qaybqaataan nidaamka caddaaladda iyo ku dhaqanka sharciga oo ay ku jiraan laamaha dembi-baarita (booliiska iyo dacwad-oogeyaasha), haddana laamaha garsoorka (maxkamadaha) iyo asluubtu (xabsiyada) waxa ay kaalin lixaad leh ka qaataan in ay shaqeeyso waaxda caddaaladdu.[41] Cid kasta oo loo xil saaro dibudhiska nidaamka caddaaladda Soomaaliya waa in ay ugu horreeyn diiradda saaraan laanta garsoorka (sida maxkamadaha), sababta oo ah sarreeynta sharcigu waxa ay ka bilaabata oo sal u ah marka la helo maxkamado si karti iyo caddaalad ku dhisan dadka u kala xukumaya.

41. Dabcan, xabsiyadu waxa ay door ka ciyaaraan oo keliya xilliga dacwad-oogista. Marka la eego qiimeynta kudhaqanka sharciga, haddii nidaamka dembi-ciqaabeedku si wanaagsan u shaqaynayo, waxay u badan tahay in ay hagaagaan masuuliyadaha maxkamadaha ka shaqeeya dacwadaha madaniga ah.

Sidaas oo kale, qeybta xeer-ilaalintu waxa ay iyaduna si dhow oo qota-dheer xidhiidh ula leedahay maxkamadaha, sida ay waajibkeeda u gudato xeer-ilaalintuna waxa ay ku xidhan tahay hadba sida uu nidaamka maxkamaddu u shaqeynayo. Haddaba, in labadaan waaxoodba isku mar dibuhabeyn lagu sameeyaa waxa ay dhabbaha u jeexeeysaa dibuhabayn ballaaran oo guud ahaan bahda caddaaladda lagu sameeyo, si loo xaqiijiyo in sarreeynta sharcigu ay caga adag ku taagan tahay.

### 1. Maxakamadaha

Waxaa jia shikhsiyaad iyo hay'ado dhowr ah oo tiirar adag u ah in ay maxkamadaha Soomaaliya si wax ku ool ah u shaqeeyaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin garsoorayaasha, qareennada, xeer-ilaaliyeyaasha, dembi-baareyaasha iyo maamulka maxkamadaha. Sidaa darteed, qiimeyn iyo dadaal kasta oo dibuhabeyn waa in diraadda lagu saaro:

- Horumarinta maamulka iyo maareynta maxkamadda si loo fududeeyo howlaha garsoorka, loo maareeyo kiisaska, korna loogu qaado waxqabadka maxkamadda.
- In laga caawiyo shaqaaleysiinta garsoorayaasha, xeer-ilaaliyayaasha iyo shaqaalaha kale ee maxkamadda si loo daboolo dulduleelada waa weyn ee garsoorka ka haysta dhanka cududda shaqaale ee xirfadda leh.
- In la siiyo tababar dhammeystiran oo loogu talogalay dhammaan shaqaalaha garsoorka si kor loogu qaadoxirfadda hawlwadeenada iyo u hoggaannsanaantooda sarreeynta sharci.
- Aasaasida Golaha Adeegga Garsoorka si loo ilaaliyo hufnaanta iyo isla xisaabtanka garsoorka.
- Hirgalinta nidaam si fiican u shaqeynaya oo loogu talogalay sameeynta iyo keydinta xogta, si loo hubiyo daahfurnaanta iyo si qumman u diiwaangelinta hawlaha maxkamadda. .
- Wacyigalinta bulshada ee ku saabsan dowladnimada iyo ku dhaqanka sharciga si loo dhiso kalsoonida dadweynuhu ku qabaan nidaamka garsoorka, loona dhiirrigaliyo ka qeybqaadashada bulshadda.

Inta lagu gudo jiro wejiga qiimeeynta, kooxda dibuhabeyntu waa in ay indho indheeyaan dacwadaha ka hor inta aan maxkamadda la hor geynin, iyaga oo si gaar ah ugu fiirsanaya in habraac sharciga waafaqsan loo marayo dacwadda ciqaabta ah, sida mudada xadhiga rumaanka iyo in uu eedeysanahu leeyahay awoodda uu ku heli karo la talin sharci. Waa in ay qiimeeyaan tayada baadhitaanka dacwadaha ogaadaanna waxyaabaha caqabadda ku ah in si sharciga waafaqsan loo wado dacwadda.

Waxaa mihiim ah in la qiro arrimaha dibadda kaga imaada ee saameya nidaamka caddaaladda, sida faragalinta ama cabsigalinta kaga imaneysa awoodaha dibadda, musuqmaasuqa baahsan, laaluushka iyo lacag bixinta sharci darrada ah, kuwaas oo dhaawacaya ku dhaqanka sharciga. Qiimeynta waa in ay ku jiraan xeer-ilaaliyaasha, qareennada difaaca, kaaliyeyaasha maxkamadaha, nootaayooyinka, danbi-oogeyaasha, iyo ciddii kale ee door ku leh maamulka caddaaladdaba.

Ka hortagga khataraha iyo rabshadaha ka dhanka ah hawl-wadeennada caddaaladda waa in la siiyo mudnaanta koowaad. Bahda caddaaladda laftooda ayaana noqon kara kuwo mihiim u ah abuurista xeelado lagu xakameeyo khataraha si loo xaqiijiyo amniga hawl-wadeennada iyo daahfurnaanta nidaamkaba.

Kooxda dibuhabeyntu waa in ay ugu horreeyn diiradda saaraan qeybta dacwadaha ciqaabta, maadaama ay dadka Soomaaliyeed baahi weyn u qabaan sharciga iyo kala danbeynta. Caqabado waa weyn oo joogto ah baa ka jira amniga asaasiga ah ilaalinta nabadgelyada guudna waa baahi deg deg ah iyada oo aan si xun loo isticmaalayn oo lagu tagrifalayn awoodda dowladeed. Waxaa baahay cagajuglaynta booliiska, adeegsiga awood sharci-darro ah iyo laaluushka. Waxa sidaas oo kale aan qarsoonayn in saraakiisha dowladda qaarkood ay hubkooda ku cabsi geliyaan dadka shacabka ah ama ay u adeegsadaan xallinta muranno shakhsi ah, waxa kale oo faafay qaadashada lacagaha sharci darrada ah ee laaluushka ah.

Kooxdu waa in ay si dhow u baadho habraacyada qabashada iyo xadhigga, hanaan socodka rumaanka, hababka maxaabiista loola dhaqmo, awoodda ay u leeyihiin in ay helaan la talin sharci iyo xaquuqda dadka ku xidhan rumaan ahaan/xabsiga kumeelgaarka, taasi oo ay ku jirto daryeelkooda caafimaad iyo la xidhiidhka qoyskoodu. Waa in hubiyo u hoggaansanaanta halbeegyada maxkamadaynta caddaaladda ku dhisan, iyo in dhibbanuhu ka qaybgalo habsocodka dhegeeysiga dacwadda. Sidoo kale, waa in la qiimeeyo hannaanka sharci ee lagu maamulo mudaharaadada, xorriyadda saxaafadda iyo howlaha ururada aan dowliga aheyn, si guud ahaan loo ogaado in xaquuqdoodu tahay mid dhawrsan. Sidoo kale, waa in la dardargaliyo la xisaabtanka masuuliyiinta dowladda, oo ay ku jiraan xadgudubka xaquuqda aadamaha ee ay ku kacaan qaar ka mid ah booliiska iyo milatarigu.

Waxa si gaar ah walaac u muujinaya xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha,[42] kuwaas oo si baahsan uga jira waddamada aan sharcigu ka talin, sida Soomaaliya. waxaa golaha baarlamaanku isku dayeen in ay meel mariyaan xeerar lagula dagaalamayo kufsiga, kaas oo ah tacaddiga jinsi ee ugu fac weyn uguna badan oo weliba inta badan lagu daboolo doodo jaban; sida oggolaansho/heshiis ma jirey mise ma jirin. Taas oo dadka qaarkii kaba cabsi qabaan in ay keento in si aan ku talogal ahayn sinnadii loo banneeynayo. Hab fikirkaan qaldani waxa uu xaaraantimaynta kufsiga ku garab wadaa sidii in sinada la xalaalaynayo, taas oo xadgudub weyn ku ah haweenka iyo gabdhaha. Haddii la rabo in dumarka iyo gabdhaha la difaaco, waa in sharciyo adag oo kufsiga lid ku ah la soo saaro, lana dhaqan geliyaa. Isku xiridda kufsiga iyo sinnada ee joogtada ahi waxa ay iska indho tireeysaa saamaynaha baaxadda leh arrimahani bulshada ku leeyihiin. Kooxda dibuhabaynta hay'adaha garsoorku waa in ay qiimeeyaan oo dib u habayn ku sameeyaan xeerarka ku saabsan dembibaarista iyo dacwad ku oogista kuwa geeysta tacadiyada jinsiga ah, si loo xaqiijiyo in si buuxda loo dhawrayo xuquuqda haweenka iyo gabdhaha oo aan dhib loogu geysan.

---

42. In kasta oo wiilasha iyo ragga waa weynba la faraxumayn karo, haddana waxa ay macno samaynayn lahayd in dibuhabaynta kobaad xoogga saarto kan ugu badan dembiyada galmada ee ka dhaca Soomaaliya—kufsiga iyo xadgudubyada kale ee galmada ee lagu la kaco gabdhaha iyo haweenka. Siyaasad-dejiyayaashu waa in ay xoogga saaraan gurashada miraha dhow ee gacantaadu gaarayso, waxaaba laga yaabaa in ay wada xumaadaan inta aad sugayso sallaan aad ku sare u fuusho.

Sidaas oo kale, kooxda dibuhabeyntu waxa ay u badan tahay in ay ogaan doonaan in inta badan la falgalka Soomaalida ee nidaamka caddaaladdu uu ku kooban yahay la kulanka ciidamada qalabka sida, kuwaas oo inta badan dadkaas ka leexiya dhanka garsoorka. Waxaa laga yaaba in ay aragtida dadweynahu tahay in garoorku yahay hay'ad aan muhiim ahayn oo dowladda uun ka tirsan. Sidaas darted, siminaaro dadweynaha lagu baro kaalinta garsoorka laguna dhiso kalsoonida ay dadku ku qabaan hay'addan waa mid lama huraan ah.

Haddaba, waa in ay maxkamadaha dadka u dhowaadaan iyaga oo taas u maraya in ay kiisaska uga go'aan gaaraan si deg deg ah, cadaalad ah oo la awoodi karo waxa ay dhanka kale u rogeeysaa aragtiyadaas dadka waxa ayna xoojineeysa mabda'a ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya.

## 2. Garsoorayaasha

Si loo dhiso garsoor madaxbannaan, Guddiga Adeegga Garsoorku waa in uu ugu horreeyn u xushaa shikhsiyaadka ugu aqoonta badan ee u tartamaya shaqada garsoorenimada, iyada oo laga bilaabayo garsoorayaasha hadda ku sugan dalka. Masuuliyadda ugu weyn ee saaran Guddiga Adeegga Garsoorka waa in uu soo xulo garsoorayaal u shaqeyn kara si cadddaalad ah kana madaxbannaan cadaadis kasta oo kaga imaan kara dhanka dowladda ama dhinacyada khilaafku ka dhaxeeyo.

Gudida Adeega Garsoorku waa in ay abuuro jewi dhiirigalinaysa madaxbannaanida laanta garsoorka, hubiyaana in garsoorayaashu ka dhawrsan yihiin yihiin faragalinta laanta fulinta, cadaadisyada siyaasiga ah iyo wax kasta oo dhaawici kara dhexdhexaadnimadooda. Waxaa sidaas oo kale mihiim ah in laga hortago in cadaadisyada dhaqaale la saaro garsoorayaasha, si aan go'aannadooda loogu yeelan saameyn aan habbooneyn. Sidaas oo kale, Guddiga Adeegga Garsoorku waa in uu dejiyaa hageyaal cadcad oo khuseeya magacaabista garsoorayaasha, muddada xilhaynta, xaquuqda maaliyadda/mushaharka iyo gunnada, si loo xoojiyo daahfurnaanta, madaxbannaanida garsoorka iyo xasilloonida shaqada garsoorka. Sidaas si la mid ah, Guddiga Adeegga Garsoorku waa in uu si cad u qeexaa anshaxa iyo akhlaaqiyaadka garsoorka, si loo hubiyo in garsooreyaashu ku dhaqmayaan heerarka ugu sarreeya ee hufnaanta shaqo, una gudanayaan waajibaadkooda sida ugu daacadnimada badan. Waxaa kale oo mihiim ah in la caddeeyo cawaaqibka ka dhalanaya anshax jebin/xadgudub kasta, si loo joogteeyo kalsoonida garsoorka.

Sidaas oo kale, Guddiga Adeegga Garsoorku waa in uu dhaqangeliyaa habraacyada korjoogtaynta iyo anshax-marinta garsoorka, si xal loogu helo ciddii ku xadgudubta halbeegyada anshaxa. Nidaamkani waxa uu xoojinayaa hufnaanta garsoorka, waxa uuna hubinayaa in ay garsoorayaashu noqdaan kuwo lala xisaabtamo, iyada oo isla markaana madaxbannaanidooda laga ilaalinayo cadaadisyo dabadeed oo ku yimaadda. Haddaba, hirgelinta mabaadiidan lagu ilaalinayo garsoorka, waxa ay Guddiga Adeegga Garsoorka u sahleysaa in uu aasaaso garsoor tayo iyo waxqabad leh, oo lagu tixgeliyo kaalintiisa lafdhabarnimada ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya.

### 3. Maamulka Maxkamadaha

Iyada oo la tixgalinayo nidaamka maxkamadaha iskudhafan ee la soo jeediyey, waa in kooxda dibuhabeyntu ay mudnaan siiso aasaaska nidaam maxkamadeed oo iswaafaqsan, kaas oo ay ku jiraan maxkamadaha rafcaanka iyo maxkamadaha sare ee dowlad goboleedyadu. Waxaa Iyana mihiim ah in maxkamadaha Muqdisho ay u u qaabeeysan yihiin si la mid ah kuwa dowlad goboleedyada, si loo xaqiijiyo iswaafaqsanaanta iyo caddaaladda guud ahaan garsoorka dalka. Hirgelinta nidaamka maxkamadaha iskudhafani waxa ay u baahnaan doontaa in waxkabeddel lagu sameeyo Dastuurka Fedaraalka iyo kuwa dowlad goboleedyadaba, si loo waafajiyo qaabdhismeedka cusub ee garsoorka.

Maxkamad kasta, oo ay ku jiraan maxkamadaha deraja koowaad, waxa ay yeelan doontaa hal garsoore iyo wixii ka badan. Intaas waxa dheer, maamuleyaasha firfircoon ee maxkamadaha oo guud ahaan loo yaqaan kaaliyeyaashu waxa aykaalin mihiim ah ka qaadanayaan in ay guuleystaan howlaha maxkamadduhu. Waxa ay maamuleyaashaasu masuul ka yihiin maamulka habsami u socodka galalka dacwadda, diiwaangelinta/keydinta garmaqallada iyo dhacdooyinka maxkamadda, la macaamilka daneeyayaasha dibadda, la socoshada arrimaha maaliyadda iyo kharashaadka, maamulidda shaqaalaha iyo in la siiyo tababar iyo waxbarasho ku habboon. Sidaas oo kale, waxa ay maamulaan nidaamka tiknoolojiyadda ee xogta lagu keydiyo kaas oo lama huraan u ah howlaha maxkamadaha casriga ah.

Diiwaangelinta iyo kaydinta xogtu waa xuddunta shaqo kasta oo maxkamadeed, waxa ayna u baahan tahay in ay jiraan xeerar iyo tabo si gaar ah loogu maamulo xogta iyo tiknoolojiyadda, si loo hubiyo saxnaanta iyo dhowrsanaanta xogta. Si loo horumariyo daahfurnaanta iyo waxqabadka, waa in la dejiyo hageyaal si cad u qeexaya cidda lagala xisaabtamayo xogta, cidda xaq u leh in ay xogtu hesho, sida loo keydinayo iyo maareynta diiwaannada xogtu ku keydsan tahay. maamuleyaasha maxkamaddu, gaar ahaan kuwa leh xirfadda iyo tababarka sharci, waa in ay si faham durugsan leh u maareeyaan dhacdooyinka culus ee maxkamadda, iyada oo la hubinayo habsami u socodka hawlaha maxkamadaha.

Iyada oo la tixgalinayo waajibaadka balaadhan iyo doorka mihiimka ah ee maamuleyaashu ka qaataan howlaha maxkamadda, waxaa lagama maarmaan ah in loo qoondeeyo miisaaniyad weyn, si loo hubiyo habsami u socodka shaqada maxkamadaha. Miisaaniyadaasi ma dabooleyso mushaharkooda oo keli ah ee waxaa sidoo kale loogu baahan yahay kaabayaasha lagama maarmaanka u ah maareynta dacwadaha, keydinta xogta iyo howlaha kale ee mihiimka ah. Si loo hubiyo in guul laga gaadho arrimahan, waa in hawlahan laga soo qaybgeliyaa maamuleyaasha maxkamadaha ee ruug-caddaaga ah si ay u diyaariyaan qorsheyaal maamul oo ku habboon maxkamad walba, taasina waxa ay muhiim u tahay soo kabashada nidaamka garsoorka ee Soomaaliya. Habkaan istaratiijiga ahi waxa uu kooxda dibuhabeynta ku kaabi doonaa in ay dhisaan kabaayaal nidaam garsoor oo karti leh, waara isla markaanaawood u leh dhawrista ku dhaqanka sharciga.

## 4. Xeer-ilaaliyayaasha

Xeer-ilaaliyayaashu waxa ay door mihiim ah ka ciyaaraan ilaalinta ku dhaqanka sharciga, waxa uuna Shirweynihii Sideedaad ee Qaramada Midoobay ee Kahortaga Dambiyada iyo La-tacaamulka Dembiilayaasha uu hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay xulashada xeer-ilaaliyeyaal leh karti iyo hufnaan.[43]

Intaa kadib waa in xeer-ilaaliyeyaashaas lagu kabaa tababarro iyo aqoon kororsi joogto ah, waana in la helaa damaanad qaad si looga hortago in ay hannaanka magacaabista ku leeg yeeshaan faquuq, eex iyo caddaalad darro.

Marka Soomaaliya la eego, arrimaha jinsiga, qabyaaladda iyo musuqmaasuqa ayaa inta badan eex ka dhaliya gudaha nidaamka garsoorka. Qabyaaladdu waxa ay si gaar ah hoos ugu dhigeysaa ka qeybqaadashada dadka laga tirada badan yahay, taas oo mihiim ka dhigeysa baaqa Qaramada Midoobey ee ku aaddan in hab doorsoocasho ah lagu xusho xeer-ilaaliyayaasha. Haddii mudnaanta la siiyo in xulashada xeer-ilaaliyaasha lagu saleeyo karti iyo hufnaan, Soomaaliya waxa ay ku tallaabsan kartaa dhanka la dagaalanka takoorka iyo faquuqa, gaar ahaanna kan lagu hayo qaybaha nugul ee bulshada.

Marka laga tago hufnaanta shakhsiga ah, xeer-ilaaliyayaashu waa in ay helaan waxbarasho iyo tababar dhammeystiran. Sidaas oo kale, waa in ay faham durugsan ka haystaan masuuliyaddooda akhlaaqiga ah iyo sidaas si la mid ah ilaalinta xuquuqda eedaysanaha iyo dhibbanaha labadaba ay siinayaan Dastuurka iyo xeerarka kale ee lagu dhaqmo. Waana in xeer-ilaaliyayaashu ay fahan dhammeystiran ka haystaan xaquuqda aadamaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee ay aqoonsan yihiin sharciga qaranka iyo kuwa caalamiga ah intuba.

Haddii nidaam garsoor oo iskudhafan laga hirgaliyo dhammaan heerarka maxkamadaha dalka, waxaa is weydiin mudan, miyaa sidaas oo kale xeer-ilaaliyayaashana lagu dabaqayaa nidaamkaas. Arrinkan waxaa soo hadal qaaday ugu yaraan hal dhinac oo ka mid ah daneeyayaasha intii lagu guda jirey doodaha ku saabsan nidaamkan la soo jeediyey. Maadaama dhammaan dacwadaha ciqaabta ah la hor geeyn doono maxkamadaha derajada kowaad oo iskudhafanuuna dembi-ooge ka yahay sidii caadadu ahayd xeer-ilaaliye maxalli ahi, waxaa mihiim ah in laga fikiro in uu xafiiska xeer-ilaalinta qaranku ku tiirsanaan doono xeer-ilaaliyeyaasha dowlad goboleedyada iyo in taa beddelkeeda hannaan kale loo baahan doono. In la fahmo saameynta uu qaab-dhismeedka xeer-ilaalintu ku leeyahay hannaankan waa mid muhiim ah, si loo hubiyo in nidaamkani u dhaqan gelinayo sharciga si wax ku ool ah, iyada oo la tixgelinayo mabaadiida federaalaynta iyo wada shaqaynta labada heer ee maamulka.

Dalal badan oo ay ku jiraan Canada, Austrailia, Switzerland, India iyo Malaysia, waxa ay leeyihiin awood garsoor laba geesood ah oo hal maxkamad ka dhaca, kuwaas oo tusaale u noqon kara Soomaaliya.

43. https://www.ojp.gov/pdffiles1/Digitization/143341NCJRS.pdf, last visited June 14, 2024.

Gaar ahaan, Hindiya iyo Malaysiya waxa ay leeyihiin nidaamka maxkamadaha iskudhafan, iyada oo ay weliba Malaysiyasi gaar ah u isticmaasho qaabka xeer-ilaaliyayaasha midaysan, kuwaas oo ka howlgala heerka fedaraalka iyo kuwa maamul goboleedkaba. Si kastaba ha ahaatee, nidaamka fedaraalka Malaysiya ee ku dhisan nidaamka boqortooyada wuu ka leexsan yahay mabaadi'da dhaqanka u ah fedaraalnimada, kuwaas oo ay u badan tahay in uu nidaamka federaalka Soomaaliya waafaqsan yahay.

Inta aanu jirin wadatashiyo qaran oo ay u dhan yihiin hoggaanka Soomaaliya, dalku waxa uu caqabado waa weyna kala kulmayaa samaaynta qaabdhismeedka xeer-ilaaliyayaasha midaysan oo ka jawaabaya baahiyaha heer fedaraal iyo kuwa heer dowlad goboleedba. Habka ugu fudud waxa uu dowlad goboleedyada u oggolaanayaa in ay soo magacaabaan xeer-ilaaliyeyaashooda gaarka ah, halka ay dowladda federaalka samaaynayso guddi u gaar ah oogista dacwad-ciqaabeedyada heer federaalka. Xeeladdan waa mid isudheelitir ku samaayn karta baahiyaha xeer-ilaalinta heer qaran iyo heer dowlad goboleed, balse u baahan taxaddar iyo iskaashi badan si loo hubiyo iswaafaqsanaanta iyo waxtarka nidaamka maxkamadaha iskudhafan. Haddaba, Soomaaliya haddii ay qaadato hannaankan waxa ay si fudud u maareyn kareysaa culeeysyada badan ee ka jira dhanka dhismaha nidaam garsoor oo tixgelinaya awoodaha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyadaba.

## 12. Waajibaadka Anshaxa ee Hawlwadeennada Caddaaladda iyo Tababarrada

Anshaxu waa aasaaska iyo ilaalinta ku dhaqanka sharciga. Waxaa caalamka oo dhan ka jira masuuliyado anshax oo lagu waajibiyay garsoorayaasha, qareennada, xeer-ilaaliyeyaasha, baareyaasha, ciidamada booliiska iyo madaxda xabsiyada, kuwaas oo uu midkastaa kaalin muhiim ah kaga jiro helitaanka nidaam garsoor oo caddaalad iyo dhexdhexaadnimo ku dhisan. Si loo xoojiyo koboca hay'adda caddaaladda, waa in ay kooxda dibuhabayntu dejiyaan masuuliyado anshax oo u gaar ah, kuwaas oo ay weheliyaan hababkii loo fulinayay halbeegyadaas.

Tusaale ahaan, nidaamyada garsoor ee ku salaysan iska-horkeenidda dhinacyada (adversarial legal systems) kuwaas oo ay qareennadu hoggaamiyaan dacwad-jeedinta halka garsoorayaashuna yihiin xaq sooreyaal dhexdhexaad ah; waxaa caado ah in garsooreyaasha laga mamnuuco in ay xiriir toos ah la yeeshaan dhinacyada dacwadda—waa in xiriir lala sameeyo hal dhinac iyada oo uu maqan yahay dhinacii kale—si looga fogaada waxkasta oo u muuqan kara eex ama dhinac u xaglin. Sidaas si la mid ah, qareennadu waa in ay ka fogaadaan danaha shakhsiga ah ee dhaawici kara masuuliyaddooda, si ay daacad ugu noqdaan matalaadda macaamiishooda.

Soomaaliya waxa ay wax ka baran kartaa nidaamyo badan oo xagga anshax-shaqada ah oo ka jira waddamo badan oo Muslim iyo cilmaaniba isugu jira, iyada oo isla markaa qaadaneysa oo tolaneeysa midka iyada ku habboon marka la eego haybsooceeda gaarka ah ee xagga dhaqanka iyo bulshada la xiriira. Dhawrista halbeegyada anshaxa ayaa shardi aasaasi ah u noqon kara magacaabista iyo shaqo-ka-saaridda garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha, baareyaasha, saraakiisha booliiska, iyo madaxda xabsiyada.

Sidaas oo kale, waa in ay qareennadu si adag ugu hoggaansamaan waajibaadka anshaxa, iyada oo ku xadgudubka ay ka dhalaneyso cawaaqibxumo, sida suurtagalnimada shaqo ka joojin.

Kooxda dibuhabayntu waa in ay hagayaal anshax oo cad-cad u dejiyaan hay'ad kasta oo caddaaladeed, waana in ay hubiyaan in shaqaalaha hay'addaas ay helaan tababarrada lagama maarmaanka u ah si ay ugu dhaqmaan halbeegyada. Haddaba, dejinta iyo hirgelinta waajibaadka anshaxu waxa ay kobcinaysaa hufnaanta hannaanka garsoorka, waxa ay xoojinaysaa kalsoonida dadweynuhu ku qabaan nidaamka caddaaladda waxa ayna ka qayb qaadaneysaa dhismaha hay'ad garsoor oo ay sal u tahay caddaalad iyo islaxisaabtan.

## 13. Xoojinta ku Dhaqanka Sharciga, Iyada oo loo Marayo Waxbarashada

Kobcinta dhaqan sharci caddaalad ku salaysan waxa uu lafdhabar u yahay taabbagalinta ku dhaqanka sharciga iyo dowlad wanaagga ee Soomaaliya. Caqabadaha ugu waa weyn ee dalka haysta waxaa ka mid ah faham xumo baahsan oo laga qabo macnaha dowladnimada. Tusaale, inta badan ma cadda xidhiidhka ka dhexeeya dowladda iyo muwaaddiniinteeda. Marka laga tago u sacbinta iscaleemo-saarka siyaasiyiinta, nidaamka awood-qaybsiga siyaasadda ee ku dhisan matalaadda beelaha ee 4.5 iyo ciidamada hubaysan ee jidadka ku daadsan, Soomaali badani wax badan kama fahamsana shaqada dowladda iyo doorkeeda. Moogaantan macnaha dowladnimada dabcan waa mid la fahmi karo marka la eego taariikhda Soomaaliya ee xukunkii kelitalisnimo iyo in aaney jirin wax waxbarasho macne leh oo lagu baranayo maamulka dawladnimo. Haddaba si loo kobciyo dhaqan sharciga aamminsan, waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo waxbarasho dadweyne oo dhammaystiran oo xoogga lagu saarayo in la dhiso hab-dhaqan sharcigu sal u yahay laguna xaqiijiyo helitaanka nidaam garsoor oo caddaalad iyo dhexdhexaadnimo ku qotama.

Haddaba, si isqardhaafkan loo xalliyo, waa in ay dowladdu qaaddo taallaabooyin hal-abuur leh oo ay ku xoojinayso in ay dadweynuhu fahmaan shaqooyinka dowladda. Aragtida qaldan ee faafay ee dowladnimada laga haysto oo ah in ay la micne tahay musuqmaasuq ayaa sii naaxineysa dhaqanka sharci la'aanta ku dhisan. Marka sakhsiyaadka xilka hayaa u arkaan jagooyinkooda ilo dhaqaale oo dano shakhsi lagu gaaro, waxa ay taasi mijaxaabineeysa ku dhaqanka sharciga waxayna abuureeysaa iskumilanka halista badan ee dowladdnimada iyo musuqmaasuqa. Bay'ad noocaan ah oo aaney ka jirin dabagal iyo cawaaqibka ka dhalaneysa ku tagrifalka awooddu, waa wax caadi ah markaas oo kale in ay natiijadu noqoto ixtiraam darrada sharciga.

Si bulshada loo baro dhaqanka sharci dhawrista, dowladda Soomaaliya waa in ay mudnaanta kowaad siisaa waxbarashada ku saabsan hab-maamulka dowladnimada iyo ku dhaqanka sharciga, iyada oo laga soo bilaabayo sannadaha hore ee waxbarashada ardayga. Sidaa darteed, isada oo ardayga looga bilaabayo dugsiga hoose, waa in wax laga baraa qaab-dhismeedka dowladda, muhiimadda u hoggaansanaanta sharciga iyo doorka qofka muwaadinka ahi ku leeyahay dal nidaam dimuqraadi ah ku dhaqma. Si kastaba ha ahaatee, casharradaas waa in lagu ladhaa/kabaa dhaqanka guriga oo ay carruurtu halkaa ka arkaan iyada oo sharcigii la ixtiraamayo si caddaalad ahna loo fulinayo. Haddii se carruurtu ay ku barbaaraan meel ay markasta arkayaan ku tagrifalka awoodda ama ay dareemaan in hay'adaha dowladda laftoodu si xun ugu dhaqmayaan sharciga, casharrada iskuulku waxba ma soo kordhinayaan.

Tusaale ahaan, koorso hordhac ah oo ku saabsan dowladda oo lagu dhigo dugsiga hoose waxaa looga hadli karaa dulmarka haykalka guud ee dowladda ee ku xusan Dastuurka, iyada oo la sharxayo kaalimiha iyo masuuliyadaha masuuliyiinta dowladda iyo muwaadinka labadaba. Marka uu ardaygu u gudbo marxaladda dugsiga sare, manhajkii waa in la sii naaxiyaa oo si qota-dheer loogu kuurgalaa mabaadi'da dastuuriga ah, iyada oo ardayda loo abuurayo madallo ay uga doodaan habdhiska dowladeed iyo doorarka laamaheeda kala duwan. Sidoo kale, doodaha ku saaban xorriyaadka shakhsiga ah, dhawrsanaanta xuquuqda ee sharcigu bixiyey iyo hababka dacwadaha ciqaabta waa in ay ardayga u iftiimiyaan dabeecada xiriirka dowladda iyo muwaadinka; si loo kobciyo dareen awood-siin iyo wacyi-dhis sharci ah.

Marka la gaaro heerka jaamacadda, xarumaha waxbarashadu waa in ay diiradda saaraan sidii ay u soo saari lahaayeen garyaqaanno si fiican u carbisan, ayna u dhaqmaan in ay yihiin fagaareyaal abuura doodo dadweyne oo ku saabsan sharci dhawrista iyo maamulka dowladnimada. Sidoo kale, bareyaasha sare iyo xirfadleyaasha khibradda lehi waa in ay fududeeyaan doodahaas, iyaga oo gacan ka geysanaya in la sharxo habraacyada sharci iyo xiriirka ka dhexeeya dacwad-oogayaasha, xeer-ilaaliyayaasha iyo jileyaasha kale ee bahda caddaaladda. Haddaba, in laga qaybgeliyo ardayda iyo dadweynaha guud ahaan doodaha ku saansan shaqada dowladda, waxa ay Soomaaliya u sahli kartaa in la xoojiyo dhaqanka guud ee sharci dhawrista, horumarinta ku dhaqanka sharciga iyo sare u qaadidda kalsoonida dadweynuhu ku qabaan nidaamka caddaaladda.

# 14. Talabixino

1. **Xoogsaarista dhammaystirka Dastuurka:**

   Waa in mudnaan la siiyo dhammaystirka Dastuurka qabyada ah. Waa in si gaar ah xal looga gaaraa qodobbada la xiriira awood-qaybsiga dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, iyo sidoo kale kala-soocidda awoodaha saddexda laamood ee dowladda iyada oo mid kasta la madaxbannaynayo. Waa in muhiimadda ugu weyn la siiyo xaqiijinta madaxbannaanida garsoorka, iyada oo si buuxda looga saarayo laanta fulinta.

2. **Mudnaansiinta dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka (JSC):**

   Waxa baahi weyn loo qabaa xalal siyaasadeed oo degdeg ah, si loo dhiso Golaha Adeegga Garsoorka, iyo sidoo kale Maxkamadda Dastuurka, iyada oo garsoorka loo aqoonsanayo in uu yahay laanta saddexaad ee dowladda, taas oo la siman laamaha sharci-dejinta iyo fulinta. Waana in la hirgaliyo shuruuc cad-cad oo ku saabsan sida Golaha Adeegga Garsoorka iyo Maxakamadda Dastuurka dib loogu qaabayn karo mustaqbalka, iyada oo laga dhabaynayo in garsooku hawlahiisa u guto si madaxbannaan, oo xor ka ah faragalin kasta oo dibadeed, waana in uu noqdaa tiirdhexaadka haykalka dowladnimada. Tani waxa ay gacan ka gaysan kartaa waaritaanka xasilloonida iyo madxbannaanida nidaamka garsoorka.

3. **In la taageero nidaamkii maxkamadeed ee ka soo baxay Heshiiskii Jowhar ee 2018, ee ay markii danbe ansixiyeen Golaha Wadatashiga Qaranku:**

   Iyada oo hirgalinaysa nidaamka maxkamadaha iskudhafan, waa in ay Soomaaliya waxkabeddel ku samaysaa dastuurkeeda si ay Golaha Adeegga Garsoorka ugu soo darto xubno matalaya nidaamyada garsoorka dowlad goboleedyada. Ilaa inta maqaamka Muqdisho xal loo helayo, waa in dhanka awood qaybsiga loo la dhaqmaa si la mid ah dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka. 24 ka xubnood ee ay soo jeediyeen Golaha Wadatashiga Qaranku ayaa golahan sees adag u ah. Inkasta oo ay dibuhabayn u baahan karaan qaybo ka mid ah xubnaha goluhu, haddana xubnihii lafdhabarta ahaa waa la asiibay, mana aha in lagu wiiqo khilaafaadka la xiriira maamulka.

4. **Dakhliga Garsoorka:**

   Waa in goluhu helo taageero maamul oo ku filan, kaas oo ay ku jirto in sharci-dejintu samayso door xoghayneed oo leh shaqaale caawiya. Waa in xoghayntani masuul ka noqotaa hirgalinta hawlaha golaha. Waa in la sameeyo shuruuc qeexaysa sida uu golahu u gudanayo waajibaadkiisa shaqo, waana in goluhu helo miisaaniyad ku filan oo uu si hufan ugu maamulo hawlaha garsoorka.

5. **Wacyigalin dadweyne oo maamulka ku saabsan:**

   Dowladda Soomaaliya waa in ay abaabushaa dadaallo aan kala har lahayn si dadwynaha loogu qabto wacyigelinno lagu barayo maamulka, doorka qabiillada iyo muhiimadda qarannimada. Wacyigelinta waxa laga bilaabi karaa jaamacadaha iyo dugsiyada sare, iyada oo dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada lagu dhiganayo casharro hordhac ah oo ku saabsan dowladnimada— halkaas oo diiradda lagu saarayo Dastuurka Soomaaliya. Casharradani waa in aanay noqon kuwo bixinaya dacaayado ama ii dheh dowladeed, balse waa in ay ahaadaan agab falanqayn oo loo adeegsanayo fahanka dastuurka iyo sida looga dhaqangalinayo maxkamadaha.

6. **Doorka ay Madaxda Soomaalidu ku leedahay Wacyigalinta Dadweynaha:**

   Madaxda Soomaalidu waa in ay door firifircoon ka qaataan wacyigalinta dadweynaha lagu barayo fahamka dowladnimada, xataa haddii ay jiraan khilaafyo siyaasadeed. Waa in laga shaqeeyo qaabaynta Dastuurka Kumeelgaarka ah si uu ugu adeego nuxurkiisa asaasiga ah— dhismaha Dowladda Federaalka Soomaaliya—waxa ayna madaxdu gacan ka gaysan karaan in ay indhaha dadweynaha ka jeediyaan siyaasadda qabiilka ku salaysan, una jiheeyaan mid ku dhisan haybta qarannimo.

7. **Samaynta madallo dadweyne oo lagu lafagurayo dastuurka:**

   Dowladda Soomaaliya waa in ay abuurtaa madallo lagaga doodi karo Dastuurka iyo arrimaha maamulka. Waa in dowladdu jaamacadaha ka taageerto qabashada madallo wacyidhis oo lagu baraarujinayo dadweynaha Soomaaliyeed, si ay aqoon-yahanka Soomaaliyeed uga doodaan arrimaha maamulka dowladnimo, isla markaana diiradda ku saaraan doodo miradhal ah oo keeni kara xalal macquul ah. Intaas waxa dheer, in jaamacadaha lagu dhiirrigaliyo in ay sameeyaan cilmibaarisyo u kuurgalaya dhaqan-bulsheedka ku saabsan qabiilnimada iyo saameynta uu qabiilku ku leeyahay dowladnimada iyo ku dhaqanka sharciga.

8. **Qorshaynta dhaqaalaha iyo cududda bulsho ee maxkamadaha iskudhafan:**

   Marka la eego dhaqaalaha iyo cududda shaqaalaha xirfadaysan ee Soomaaliya oo kooban, waa in ay labada heer ee dowladdu— dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu- dhaqaale cayiman iyo shaqaale ku filan ku taageeraan nidaamka maxkamadaha iskudhafan. Maxkamado si wacan u shaqaynaya oo kooban, oo ay ka hawlgalaan garsoorayaal karti leh oo madaxbannaan, isla markaana haysta miisaaniyad ku filan ayaa hirgalin kara himilooyinka dowladda ee maamul hufan. Nidaamkan si tartiib ah ayaa hadba sida loogu baahdo loo kobcin karaa.

9. **Isticmaalka nidaamka maxakamadda wareegta:**

   Soomaaliya waa in ay isticmaashaa nidaamka mxakamadda wareegta si ay u sii yarayso baahida loo qabo tiro badan oo guryo-maxkamadeed iyo garsoorayaal ah.. Waxa uu habkani Soomaaliya u oggolaanayaa in ay isku fillaysiiso khayraadkeeda dhaqaale iyo shaqaale xirfadaysan ee xaddidan, isaga oo xaqiijinaya in guud ahaan Soomaalidu heli karto adeeg caddaaladeed oo hufan.

# 15. Tixraacyo


1. Rebuilding Somalia's Broken Justice System: Fixing the Politics, Policies and Procedures, 2021; https://heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2021/01/Justice-Report-Jan-6-1-1.pdf

2. International projects such as the World Justice Project (WJP). https://worldjusticeproject.org/

3. Rule-of-law Tools for Post-Conflict States-- Vetting: an operational framework, https://www.ohchr.org/sites/default/files/Documents/Publications/RuleoflawVettingen.pdf.

4. Rule-of-law Tools for Post-Conflict States-- Truth commissions; https://www.ohchr.org/sites/default/files/Documents/Publications/RuleoflawTruthCommissionsen.pdf.

5. Rule-of-law Tools for Post-Conflict States-- Mapping the justice Sector; https://www.ohchr.org/sites/default/files/Documents/Publications/RuleoflawMappingen.pdf.

6. Rule-of-law Tools for Post-Conflict States-- Monitoring legal systems; https://www.ohchr.org/sites/default/files/Documents/Publications/RuleoflawMonitoringen.pdf.

7. Rule-of-law Tools for Post-Conflict States-- Maximizing the legacy of hybrid courts. https://www.ohchr.org/en/publications/policy-and-methodological-publications/rule-law-tools-post-conflict-states-maximizing.

8. Various reports on the process of drafting the Provisional Constitutional by the Max Plank Institute for Comparative Public Law and International Law were also reviewed.

9. G. A. Res. 67/1, ¶2 (Nov. 30, 2012).

10. What is the Rule of Law? | World Justice Project, last visited May 12, 2024.

11. Somalia—a case Study, Helen C. Metz, Federal Research Division, Library of Congress, 1992.

12. "Somalia Country Report on Human Rights Practices for 1998," by U.S. State Department, https://1997-2001.state.gov/global/human_rights/1998_hrp_report/somalia.html, last visited May 19, 2024.

13. Muhammad Munir, "Fundamental Guarantees Of The Rights Of The Accused In The Islamic Criminal Justice System," Hamdard Islamicus 45 Vol. XL, No. 4, 2017.

14. Muhammad Adel Haleem, Adel Omar Sherif, and Kate Daniels, “Criminal Justice in Islam,” Eds., I.B.Tauris (publisher), 2018.

15. Montesquieu, The Spirit of the Laws, Cambridge Texts in the History of Political Thought series, page 157.

16. https://www.ojp.gov/pdffiles1/Digitization/143341NCJRS.pdf, last visited June 14, 2024.

17. The Cape Town Principles of Independent Commissions, https://constitutionnet.org/sites/default/files/cape_town_principles_-_february_2016.pdf.

HERITAGE
INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org